

Wuxuu u jawaabay oo ku yidhi, Miyaydnaan akhriyin, Kii bilowgii uumay iyaga wuxuu ka dhigay lab iyo dhaddig, oo wuxuu yidhi, Sababtaas aawadeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa, oo labaduba waxay noqonayaan isku jidh? Matayos 19:4-5

Wuxuu u jawaabay oo ku yidhi, Miyaydnaan akhriyin, Kii bilowgii uumay iyaga wuxuu ka dhigay lab iyo dhaddig, oo wuxuu yidhi, Sababtaas aawadeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa, oo labaduba waxay noqonayaan isku jidh? Matayos 19:4-5

Farxadda Weynee Ku Jirta Masiixa

#### Tusmada Kitaabka

1. Farxadda Dhabta ah

2. Qarsoodiga Farxadda

Su'aalaha Cutubyada Koowaad iyo Labaad

3. Ballanqaadyada Ilaah

4. Ku Biir Dugsiga Farxadda

5. Abaal marinta Ilaah

Su'aalaha Cutubyada Saddexaad, Afraad iyo Shanaad

6. Dhibaatooyinka Walwalka

7. Iska Jooji Walwalitaanka

8. Ma Lihid Cudurdaar

Su'aalaha Cutubyada Lixaad, Toddobaad iyo Siddeedaad

9. Jidka Farxadda

10. Sugnaanshaha Farxadda

Su'aalaha Cutubyada Sagaalaad iyo Tobnaad

## CUTUBKA KOWAAD

### Farxadda Dhabta ah:-

Dhammaanteen waxa aan jecelnahay in aan ahaanno kuwo faraxsan laakiin taasi ma'aha arrin fudud, waayo waxa aan rabnaa inaan helno wax kasta oo dunida guudkeeda yaalla, inaga oo markaasna u malaynayna inay sidaas farxaddu ku jirto. Haddaba, Rasuul Bawlos ayaa waxa uu lahaa aragti middaas ka duwan gebi ahaanba, isaga oo markaasna qoray:

*“Ka hadli maayo baahi, waayo, waxaan bartay inaan raalli ku ahaado hadba xaaladdii aan ku jiro. Waxaan aqaan saboolnimada, oo weliba waxaan aqaanna barwaaqada. Meel kasta iyo wax walba waxaan ku bartay dhergidda iyo gaajadaba, barwaaqada iyo baahidaba”* (Filiboy 4:11-12).

Haddaba, Ilaah oo keliya ayaa ah midka iska leh farxadda runta ah, waayo isagu uma baahna wax ama shaqsi farxad geliya. Xitaa intii aan la abuurin dunida ka hor, Ilaah Saddexmidnimada isku muujiyay waxa uu ahaa mid iska leh oo haysta farxad buuxda. Sidoo kale dadka rumaysadka lehna Isaga ayaa ka dhiga kuwo hela farxaddiisa, tanina waxa weeyi arrin ay u baahanyihiin rumaystayaashu, maxaa yeelay iyagu ma'aha kuwo iskood u heli kara farxadda ay u baahanyihiin. Ilaah ayaa iyaga siiya dhammaanba waxa ay u baahida qabaan sida ku qoran Injiilka Yooxanaa:

*“Dhammaanteen waxaynu buuxnaantiisa ka helnay nimco ka nimco”* (Yooxanaa 1:16).

Haddaba, dadka rumaysadka leh waxa u suurtoobaysa inay mar walba noqdaan kuwo farxad hela xitaa haddii ay adduunyo yar haystaan, maxaa yeelay waxa ay haystaan barakada ruuxiga ah ee Ilaah bixiyo. Masiixa ayay ku haystaan wax kasta oo ay u baahi qabaan.

Farxaddan Masiixiyadda waxa mararka qaar lagu magacaabaa “ku raalli ahaansho”. Rasuul Bawlos ayaa waxa uu qorayaa:

*“laakiin cibaadadu waa faa'iido weyn markii waxa la haysto raalli lagu yahay; waayo, dunida waxba ma aynu keenin, waxbana ka qaadan kari mayno. laakiinse haddaynu haysanno dhar iyo dhuuni, way inagu filnaan doonaan. laakiin kuwa doonaya inay taajir noqdaan, waxay ku dhacaan duufsasho iyo dabin iyo damacyo badan oo nacasnimo ah waxyeellona leh, oo dadka ku hafiya baabbi'in iyo halaag”* (I Timoteyos 6:6-9).

Sidaas oo kale waxaa ku qoran waraddii loo qoray Cibraaniyadda sidatan: *“Dabiicaddiinnu ha ahaato mid aan lacag jeclayn, oo waxaad haysataan raalli ku ahaada, waayo, isaga qudhiisu wuxuu yidhi, Sinaba kuu dayn maayo, oo sinaba kuu dayrin maayo”* (Cibraaniyada 13:5).

Waxa ugu horreeya ee haddaba laga odhan karo farxaddan Masiixiyadda ayaa ah in ay kasoo burqato gudaha. Waxa suurto gal ah inaan iska dhigno kuwo ku faraxsan waxyaalaha Ilaah ina siiyay inaga oo dhinaca kalena gudaha ka dhibaataysan oon farxad ka haysanin, hase ahaatee Ilaah waxa uu marwalba ogsoon yahay waxa aan ku fikirayno ee qalbiyadeenna ku jira. Nabi Daa'uud ayaa waxa uu qoray:

*“Naftaydoy, Ilaah oo qudha sug”* (Sabuurka 62:5),

maxaa yeelay waxa uu ogsoonaa in middaasi ay tahay jidka keliya uu si dhaba loogu farxo. Kalsoonidan Ilaah lagu yeesho iyo farxaddan ka soo burqanaysa rumaystayaasha guduhoodu, waxa ay samaynaysaa qayb kasta oo iyaga ka mid ah. Nabi Daa'uud waxa uu garanayay in Ilaah uu yahay kan wax walba maamula, laakiinse haddana mararka qaarkood waxa la soo gudboonaaday niyad jab, waayo umuu oggolaanin in xaqiiqadani ay si dhaba saamayn ugu yeelato sida uu ugu fikirayay, taasina waxa ay ahayd midda ku kalliftay inuu qoro: *“Naftaydoy, bal maxaad u murugaysan tahay? Oo bal maxaad gudahayga ugu rabshaysan tahay? Ilaah ku kalsoonow, waayo, weli waxaan isaga u ammaanayaa caawimaadda wejigiisa”* (Sabuurka 42:5).

Haddaba, sidiisa oo kale ayaa inagana la inaga rabaa in aan qalbiyadeenna dhigno farxaddaas ka soo burqanaysa gudaha ee inaga dhigaysa kuwo helo farxad dhammaystiran. Farxaddani waxa weeyi farxadda Masiixiyadda oo ah mid weligeed waaraysa.

Arrinta labaad ee ay suurto gal tahay in aan ka nidhaahno farxadda Masiixiyadda, ayaa waxa ay tahay iyadoo ah mid waaraysa xitaa marka ay jiraan dhibaatooyinku. Dadka rumaystayaasha ah marka ay la soo gudboonaato dhibaataadu, sida dadka kale ayay u dareemaan murugo, sidoo kalena marka ay kuwo kale ku jiraan cidhiidhi, waxa dhacda in rumaystayaashuna ay iyaguna la murugoodaan. Way isu duceeyaan oo kuwa dhibaataysanna way u duceeyaan. Sidaas oo kale ayaa la inaga rabaa,

*“waayo xitaa Rabbi Ciise ayaa maray xanuunka iyo jarribaadda, “taas aawadeed wuu karaa inuu caawiyu kuwa la jirrabo”* (Cibraaniyada 2:18).

Rumaystayaasha qaan gaadhka ah ee ay la soo deristo dhibaataadu, waxay u tukadaan Ilaah oo ma noqdaan kuwo gudaha ka gubta, sidoo kalena marka la jirrabo waxa ay noqdaan kuwo naftooda hanta oo is xakameeya. Ilaah kama murugoodaan, laakiinse waxa ay ku socdaan addeecitaankiisa iyo jacaylkiisa. Marka ay ka hadlayaan dhibaatooyinkoodana, waxa ay kaga hadlaan salaadda dhexdeeda, maxaa yeelay waxay rumaysanyihiin inuu Ilaah iyaga u gargaari karo oo taasna uu awood u leeyahay.

Dhinaca saddexaad ee muhiimka u ah farxadda ku sugan Masiixiyaddu waxa weeyi iyada oo ah shuqulka Ilaah ama wax Ilaah ku lug leeyahay, maxaa yeelay ma'aha mid u ahaatay xaalad dabeecadeed oo asal ahaanteed u faraxsan, sidoo kalena ma'aha natiijo ka timaadda iska ilaalinta waxyaalaha xidhxidhan een farxadda keenayn ee dunida dhexdeeda ka socda, maxaa yeelay xitaa kuwa aan rumaysadka lahayn ayaa iska ilaaliya waxyaabahan.

Haddaba, farxadda Masiixiyaddu waxa weeyi mid ka wayn iyadoo la isku dayo in laga dheeraado waxyaalaha walwalka keenaya oo keliya.

Waxa ay leedahay wax kale oo dhinaca wanaagsan ah, maxaa yeelay qofka rumaystaha ahi waxa uu rabaa inuu mar walba ahaado mid faraxsan oo middaasina waxa ay waynaynaysaa Ilaah.

Dhinaca afraadna, waxa kale ee aynu ka tilmaami karno farxadda Masiixiyadda ayaa ah iyadoo waxa qofka rumaystaha ah farxadda runta ah u keenayaa ay tahay isaga oo fala ama sameeya waxa ay tahay doonista Ilaah. Rumaystayaasha laguma qasbo inay addeecaan Ilaah balse iyaga ayaa Ilaah ku addeeca farxad, waxaanay middaas ku helaan faraxaddooda. Marka ay arrintaas ku fikirayaanna, waxa ay garanayaan oo dareensanyihiin inaanu jirin wax loo dhigo oo la mid ah, isla markaasna u farxad gelinaya sida ay u farxad gelin karto Ilaah oo loo hoggaansamo. Waxa ay raalli ku yihiin iyada oo Ilaah uu yahay midka qorshaynaya ee u jihayanaya mustaqbalkooda, xitaa haddii qorshahaasi uu yahay mid ka geddisan waxa ay rabaan. Xaqiiqaduna waxa ay tahay iyada oo Ilaah uu nafhooda u garanayo una fahmayo si kawayn sida ay iyagu isu fahmi karaan. Laakiinse kuwa aan rumaysadka lahayn ee u

malaynaya in mustaqbalkoodu uu gacantooda ku jiro, waxa ay yihiin kuwo ka cabsanaya mustaqbalka, maxaa yeelay qalad keliya oo ay galaan ayaa waxa uu ku keenayaa aaf ama dhibaato, laakiinse kuwa rumaysadka lihi waxa weeyi kuwo aan waxba ka casbi qabin, maxaa yeelay waxa ay mustaqbalkooda gacanta u geliyeen Ilaah iyaga oo markaasna ku raaxaysanaya inuu isagu hoggaamiyo. Nabi Sulaymaankii xikmadda badnaa ayaa waxa uu qoray sidatan:-

*“Qalbigaaga dhammaantii Rabbiga ku aamin, Oo waxgarashadaadana ha isku hallayn. Jidadkaaga oo dhan isaga ku qiro, Oo isna waddooyinkaaguu toosin doonaa.”*  
Maahmaayadii 3:5-6.

Rumaystayaasha oo garta xaqiiqada ah in Ilaah waxkasta maamulayo ayaa waxa ay iyaga ka dhigaysaa kuwo faraxsan, haddii ay ku jiraan cidhiidhi iyo haddii kaleba, marka ay u fiirsadaan dhacdooyinkana waxa ay arkayaan oo u muuqanaysa sida uu iyaga Ilaah u hoggaamiyay.

Waxa kaloo intaas ka sii badan, iyada oo farxadda Masiixiyaddu ah mid waaraysa cidhiidhiga iyo dhibaataada aynu la kulmaynaa nooca ay doonto iyo inta ay doontaba ha ahaato ee. Rumaystayaashu ma’aha kuwo xaq u leh inay go’aan ka gaadhaan dhibaataada la soo gudboonaanaysa, tusaale ahaan ma sheegan karaan inay diyaar u yihiin inay waayaan waxa ay hanti haystaan oo dhan oonay waayin caafimaadkooda!

Waxa ay yihiin kuwo marwalba faraxsan nooca ay doontaba ha noqoto dhibaataada ku imanaysaayee. Waxa laga yaabaa in ay isugu xigxigi karaan dhibaatooyin badani ilaa ay u muuqato in noloshooduba ay tahay dhibaatooyin taxane ah, hase ahaatee marwalba waxa ay gudohooda ku haystaan farxad dhab ah. Waxa laga yaabaa in loo arko inaanay dhibaatooyinkoodu dhammaad lahayn, hase ahaatee farxaddooda waxa ay marwalba ku kaydsanayaan gudaha, sidaasna waxa ammaan ku helaya Ilaaha noloshooda oo dhan u qorsheeyay.

## CUTUBKA LABAAD

### Qarsoodiga Farxadda:-

Rasuul Bawlos ayaa waxa uu sheegay inuu bartay qarsoodiga ku qancitaanka. Waxa uu ku magacaabayaa qarsoodi, maxaa yeelay waxa weeyi arrin aanay dadka badankoodu baranin, sidoo kalena waxa dadka aan rumaysadka lahayn ku adag inay fahmaan waxa rumaystayaasha ka dhigaya kuwo faraxsan. Haddaba, cutubkan waxa aan ku baran doonnaa waxyaalo ka mida arrimaha ku saabsan farxadda Masiixiyadda ee laga yaabo in ay noqon karto arrin lagu wareero.

Ugu horrayn: farxadda Masiixiyaddu waxa weeyi mid lagu wareeri karo, maxaa yeelay waxa ay koobsanaysaa iyadoo dhinac lagu kaaftoomo dhinac kalena aan lagu kaaftoomin. Rumaystayaashu waxa weeyi kuwo marwalba faraxsan, sababtuna waa iyagoo dareensan inuu Ilaah la jiro iyaga, sidoo kalena waa ay murugoonayaan haddii arrintaas ay si dhab ah u dareemi waayaan. Waxa kale oo murugo gelinaya marka ay xasuustaan xumaanta denbiyadooda, maxaa yeelay denbiga ayaa ah midka iyaga ka xaaraantinimaynaya ama u diidaya inay Ilaah weheshadaan. Hase ahaatee janada oo keliya ayaa ay ku noqon doonaan kuwo bilaa denbi ah iyagoo Ilaahna la yeelanaya xidhiidh aan kala go’itaan lahayn. Sidoo kalena iyagu kuma dhergayaan waxyaabaha ay doorbidaan dadka aan rumaysadka lahayni. Rumaystayaasha waxa wax kasta uuga muhiimsan inay dareemaan iyagoo ah kuwo xagga Ilaah laga jecelyahay. Dareenkan oo kale waxa wax ka qoray Sabuurlaha Aasaaf :-

*“Bal, yaan samada ku leeyahay adiga mooyaane? Oo dhulkana laguma arko mid aan kaa jecelahay” Sabuurka 73:25.*

Dareenkanina waxa uu yahay iyagoo ah kuwo laga jecelyahay xagga Ilaah, waxaanu dadka rumaystayaasha ah ka dhigay kuwo faraxsan xitaa wakhtiga ay jiraan dhibaatooyinka ugu darani.

Waxa kale oo rumaystayaashu ay tijaabinayaan khibradna u yeelanayaan nabadda uu bixiyo Ilaah oo ah nabadda ka sarraysa waxgarasho kasta (Filiboy 4:7). Marka ay haddaba nabaddaas tijaabiyaan, ma noqonayaan kuwo la'aanteed faraxsanaada, waayo waxa ay garanayaan in nabaddani ay tahay mid ka soo burqanaysa Sayid Ciise Masiix oo ah Amiirka Nabadda. Waxa ay khibrad u yeelanayaan oo helayaan nabaddan markasta oo addeecitaankooda ay isaga addeecayaanii uu gaadho halka ugu sarraysa. Waxa middaas iyana liddi ku ah iyada oo kuwa aan rumaysadka lahayni ay yihiin kuwo raadinaya nabadda, hase ahaatee ma doonayaan inay addeecaan Sayid Ciise Masiix. Waxa haddaba lagama maarmaan ah in rumaystayaasha ay la kulmayaani ay yihiin kuwa dadka oo dhan ugu dareemis badan farxadda, raalli ahaanshaha iyo nabadda. Marka ay sababta waydiiyaanna, waxa ay muminuuntu ku jawaabi doonaan: “In sababtu ay tahay iyagoo ah adeegayaasha Amiirka Nabadda”.

Marka labaad: Farxadda Masiixiyaddu waxa ay tahay mid jaho wareerinaysa kuwa aan rumaysadka lahayn, maxaa yeelay ma'aha mid ku samaysmaysa waxbadan oo la qaato, balse waxa ay ku abuurmaysaa iyadoo waxa yar lagu qanco. Kuwa aan rumaysadka lahayni waxay u malaynayaan in markasta oo ay helaan wax badan oo ay ku raaxaystaan ay helayaan farxad badan, halka ay rumaystayaashuna ka garanayaan in waxyaalahan adduunyada yaallaa inyaroo kooban mooyee aanay marnaba keenaynin farxadda; oo kuwa hodanka ahi waxa laga yaabaa inaanay helinba farxadda, laakiin waxa rumaystayaasha siinaya farxadda dhabta ahi, waxa weeyi iyaga oo doonaya inay doortaan waxyaalaha uu Ilaah u dooro inay helaan oo keliya. Farxaddoodu ma'aha mid ku imanaysa iyada oo bangiga lacag badani ugu jirto, laakiinse waxa weeyi mid ku imanaysa doonistooda ah inay ku qancaan waxyaalaha Ilaah u dooray inuu siiyo iyaga.

Ka haysta waxbadan ee raba inuu sii korodhsado waxa uu noqonayaa mid muruguuda, halka qofka haysta waxyar een raadinayn wax dheeraad ahina uu ka noqonayo mid faraxsanaada. Taasi waxa ay ka dhigantahay sidii nin leh labo lugood oo gaagaaban isla markaasna uu si fudud ugu socon karo, hase ahaatee waxa uu u hanqal taagayaa mid kale oo leh lug dheer iyo lug gaaban! Casharkani waxa uu muhiim u yahay rumaystayaasha si ay wax u bartaan wakhtigan aynu maanta joogno oo ah xilli ay kuwa aan rumaystayaasha ahaynin rabaan inay korodhsadaan waxyaalaha maaddiga ah iyaga oo markaasna ku guulaysanaya helitaankooda. Waxa rumaystayaasha laga rabaa inay kuwa kale u muujiyaan in farxaddu ay ku dhammaystirmayso iyadoo la doono waxyar, balse aanay ahayn iyadoo la helo waxbadan.

Marka saddexaad: Sidoo kale farxadda Masiixiyadda waa lagu wareeri karaa, maxaa yeelay mararka qaar jidka loo marayo farxaddu ma'aha ka dheeraanshaha walwalka, laakiinse waxa weeyi iyadoo uu bilaabmo dhinaca kalena waxkale oo laga walwalo.

Tusaale ahaan aan ka soo qaadno iyadoo ay dhibaato gaar ahi culays inagu hayso. Haddii markaas aynu u malayno in waxa aynu ku helayno farxaddu uu yahay iyada oo dhibaataadaas laga takhaluso ama xalkeeda la helo, nafteenna ayaynu khiyaanaynaynaa; maxaa yeelay waxa inaga hortaagan farxaddu run ahaantii waxa weeyi dembiga, haddii markaas aynu ka walwalno xagga dembiga, dhibaatooyinkeenna kalena waa ay yaraan doonaan.

Haddaba dembiga mararka qaar ay dadka rumaystayaasha ahi si gaara ugu dhici karaan ayaa ah, inay illaawaan in waxa agtooda ahaadayba uu ka ahaaday xagga Ilaah, sidaasi darteedna

waxa laga yaabaa inay illaawaan Ilaah oo loo mahad naqo, ama waxa ay Ilaah ku eedeeyaan oo ku canaantaan waxyaalaha ku dhacaya aawadood. Haddii ay xasuusan lahaayeen inuu Ilaah iyaga uga wanaagsan yahay in ka badan sida ay mutaysateen, waxa u fududaan lahayd inay noqdaan kuwo faraxsan xitaa wakhtiyada adaygga badan.

Tusaale ahaan haddii qoys uu arko iyada oo waxyaalaha ay mustaqbalka u qorsheeyeeni aanu u dhicin sidii loogu talo galay, waxa imanaysa in midba midka kale uu qabsado oo uu eedeeyo. Laakiinse is-qabqabsiga iyo muranku waxa weeyi gefitaan, sidaasi darteedna, waxaana laga rabaa inay joojiyaan arrintaas iyaga oo Ilaahna dembi-dhaaf waydiisanaya, waa haddii ay markaas rabaan inay noqdaan kuwo faraxsanaada mustaqbalka.

Marka afraad: waxa kale ee lagu wareeri karo marka la eego farxadda Masiixiyadda ayaa waxa ay tahay iyada oo dhibaataada oo la xalliyaa aanay ahayn shuruud lagu helayo farxadda; waxa dhacda in mararka qaar uu Ilaah inagu barakadeeyo dhibaataada iyo xanuunka dhexdiisa, taasi waa midda uu qoray Rasuul Bawlos:-

*“Waayo, damaca jidhku waa ka gees Ruuxa, Ruuxuna waa ka gees jidhka, maxaa yeelay, kuwanu waa kala gees, si aydnaan u samayn waxyaalahaad doonaysaan.”* (Galatiya 5:17).

Loollankani waxa uu si joogto ah uga dhex dhacayaa qofka rumaystaha ah dhexdiisa. Mararka qaarna waxa dhacaysa in in dhibaataadu ay inaga caawiso inaan ka guulaysano jidhka iyo inaan Ilaah si aada uugu sii dhowaanno, sidan ayaanu xanuunka ama dhibaataadu ay isugu bedelaysaa barako.

Marka shanaad: waxa kale oo farxadda Masiixiyadda ka dhigi kara mid lagu wareero iyada oo aan ku rumoobayn ama ku imanayn waxbadan oo la qaato ama la helo, laakiinse waxa ay ku imanaysaa inaga oo kordhinaya waxa aan fulinayno. Waxa uu rumaysatah odhanayaa “Ilaahbaa ka dambeeya waxa igu dhacay, wixii igu dhacay aawadoodna uma faraxsani sidii hore u ahaa, laakiinse ma’aha inaan ashkatoodo ee waxa igu waajiba inaan raadiyo jidka kale oo cusub oo aan Ilaah uugu adeego oo markaasna aan addeecitaankiisa ku helo farxad”.

Rumaystayaashu waxa ay noqonayaan kuwo aad ugu farxa in karaankooda ay Ilaah ugu adeegaan, mana aha iyaga oo raadinaya wax ka baxsan kartidooda, waayo lama rabo inay ahaadaan sida carruurta isku dayaysa inay taabtaan daruuraha.

Marka lixaad: waxa farxadda Masiixiyadda kuwa aan rumaysadka lahayn uga dhigaya wax lagu wareero ayaa ah, iyadoo waxa rumaystayaasha ka dhigaya kuwo faraxsan ay tahay inay bartaan aqbalitaanka xaqiiqada ah inay doonista Ilaah tahay midda ugu wanaagsan, marka aad middaas gartaanna, marka ay u rumoobi waydo waxa doonistoodu tahayna arrintaasi wax dhibaato ah kuma keenayso, laakiinse wax ay ku faraxsanyihiin in ay doonaan waxa Ilaah doonayo, iyo inay jeclaadaan waxa Ilaah jecelyahay sidoo kalena nacaan waxa Ilaah uu nacayo. Xaalad kastoo ay ku jiraan waxa ay odhanayaan: “Ilaahay waxa uu xikmad igu siiyay xikmadda Ruuxa, waxaanu iga dhigay quduus, waxaanu I baray in doonistiisu ay tahay midda ugu wanaagsan, sidaas ayaanu Ilaah raalli ku yahay oo ku ammaanmayaa aniguna aan u faraxsanahay”.

Waxa haddaba suurto gal ah inaan lixdan sababood ee lagu wareerayo aan ku soo duuduubno in waxa rumaystaha ka dhigaya inuu faraxsanaado ay tahay iyada oo Ilaah uu isaga ka dhigayo quduus, sidaasi darteedna farxaddiisu waxa ay ku tiirsantahay waxa uu Ilaah samaynayo. Marka uu Yacquub qoray: *“Dagaallada iyo dirirta idinku dhex jira xaggee bay ka yimaadaan? Miyaanay ka imanin damacyadiinna ku dhex dagaallamaya xubnihiinna?”* (Yacquub 4:1) waxa uu ina tusinayay in waxa keenaya dhibaataada iyo murugada ku imanaysa rumaystayaashu ay tahay noloshooda oo dembi ama gaf ku jiro, haddii markaas aan ka takhallusno ama meesha ka saarno dareenkaas xanuunka badan ee inagu dhex jira isla

markaasna dembigu ku dheehanyahay ee keenaysa sharka, waxa aan noqonaynaa kuwo faraxsanaada. Marka la soo koobana farxadda runta ahi ma'aha mid ku timaadda waxa aan haysano, balse waxa ay ku tiirsantahay kolba nooca ay dadku yihiin. Taasina waxa weeyi qarsoodiga farxadda wayn.

Kuwa farxaddoodu ay tahya noocan, waxa weeyi kuwo gudaha ka faraxsan maxaa yeelay gudaha ayay ka yihiin kuwo Ilaah ka cabsad ku leh. Waxa ay raalli ku yihiin waxkasta oo Ilaah uu siiyo iyaga, maxaa yeelay waxay ku kalsoonyihiin in waxkasta oo ay haystaani uu yahay hibo ka ahaatay xagga Eebbe. Ha ahaato caafimaad, hoy ama guri, wax la cuno, wax la xidho, saaxiibbo ama qoys, shaqo ama fursado kaloba, dhaammaantood waxa weeyi hibo Eebbe bixiyo, waxaanay calaamad u tahay jacaylka uu iyaga u qabo, sidaasi darteedna muminiintu dhammaan waxyaalahan waa ay ku faraxsan yihiin. Waxa laga yaabaa inay haystaan wax ka yar waxa ay haystaan kuwa aan rumaysadka lahayni, hase ahaatee waxa ay haystaan ayaa marwalba ay si wayn u qadarinayaan, waayo waxa ay garanayaan waxa u wanaagsan dadku inay tahay inuu lahaado wax yar, oo uu ahaado carruurta Ilaah, waxaanay uga wanaagsantahay inuu wax badan helo oo kaddibna uu galabsado xukunka Ilaah. Waxa kale oo intaas dheer, iyada oo rumaystayaashu ay garanayaan in calaamad kasta oo tusinaysa jacaylka Ilaah isla markaasna ay helayaan ay ka dhigantahay damaanad-qaad ama carbuun ah inuu Ilaah ballan qaadyadiisa wanaagga badan ku oofinayo nolosha imanaysa dhexdeeda.

Haddaba waxkasta oo iyaga Ilaah uu siiyo waa ay ku faraxsan yihiin, waxaanu xasuusinayaa farxadda dheeraadka ah ee ay ku naaloon doonaan.

Mar kalena waxa aan odhan karnaa rumaystayaashu waxa ay ka faraxsan yihiin gudaha, maxaa yeelay gudaha/xagga qalbiga ayaa ay saafi ka yihiin, waxaanay arkayaan iyaga oo marka ay ku timaaddo dhibaato ku fikira Sayid Ciise Masiix, tanina waxa weeyi midda ugu weyn ee ay kaga dheeraan karaan murugada aadka u badan. Marka ay akhriyaan Kitaabka Quduuska qaybtiisa Axdiga Cusub ee ah waxa ay arkayaan sida uu Sayid Ciise Masiix u silcay, waxaanay garanayaan in Sayidku uu la xanuunsanayo marka ay xanuunsadaan, waayo waxa uu Isagu horeba u tijaabay oo u soo arkay xanuunka. Sayid Ciise Masiix waxa uu arkay dhammaanba nooca xanuunka oo dhan: sida midka jidhka, ka maaddiga ah, ka caadifadda ahaaneed, iyo midka ruuxi ahaaneed. Ciise waxa uu ahaa sabool, sidaas darteedna waxa uu u gargaari doonaan rumaystayaasha saboolka ah, sidoo kalena maadaama oo dulmi lagu sameeyay, waxa uu xoojin doonaa kuwa la dulmay. Isaga waa la dhibay, sidaasi darteedna waxa uu awoodaa inuu xoojiyo dadka rumaystayaasha ah ee Isaga ka dalbanaya xoogaynta marka lagu jiro waqtiga xanuunka. Waxa uu Sayidka ballanqaadkiisu ahaa inuu meelkastaba kula jiro rumaystayaasha. Waxa dhici karta in rumaystayaashu ay ka cabsadaan dhimashada, laakiin waxa ay helayaan dhiirranaan marka ay ka fikiraan dhimashadii Sayid Ciise Masiix, gaar ahaanna marka ay xasuustaan inuu ka sarakacay dhimashada.

Kaasi waxa weeyi jidka keliya ee rumaystayaasha u suurto gelinaya inay awood ku helaan marka ay dhibaatoadaan. Waxa ay jalleecayaan Masiix awoodda u leh inuu ka dhafo denbiyadooda, oo uu ka dhigo quduusiin, isla markaasna uu uga gargaaro jarribaadooda. Markii uu Rasuul Bawlos u qoray kuwo ka mida rumaystayaasha oo ku sugnaa jarribaado adag, waxa uu iyaga kula dardaarmay inaanay ku takri falin kartiyohooda u gaarka ah, balse ay ku xoogaystaan awoodda uu bixiyo Masiixu, waxaanu Ilaah uuga baryay *“inay ku xoogaystaan xoog oo dhan sida uu yahay itaalka ammaantiisu xagga adkaysashada iyo dulqaadashada farxaddu la jirto oo dhan”* (Kolosay 1:11).

Ugu danbayn, qofka gudaha ka faraxsani maadaama oo uu gudaha saafi ka yahay, waxa uu helayaa in farxadda ugu wayn waxa keenayaa ay tahay iyadoo Ilaah aqoon loo yeesho. Qoraaga Baroorashadii Yeremyaah ayaa wax waliba waxa ay u ahaayeen niyad jab. Magaalada Yeruusaalem ayaa waxa ay ku dhacday gacanta cadowga, waxaanay u muuqatay

in dadkii Ilaah ay noqdeen kuwo bilaa mustaqbal ah, hase ahaatee waxa uu garanayay in meesha keliya ee ay ka timaaddo farxadda runta ahi ay tahay Ilaah, sidaasi darteedna waxa uu qoray isagoo leh: *“Naftaydu waxay tidhaahdaa, Rabbigu waa qaybtaydii, sidaas daraaddeed isagaan rajo ku qabi doonaa.”* (Baroorashadii Yeremyaah 3:24).

Waxa aynu garanay in Eebbe uu yahay uu yahay kan rumaystayaasha siiyay waxkasta, waxa Ilaah bixiyaana waxa uu u keenaa ama u soo jiidaa farxadda sida ay dhuumaha ama tubooyinku u soo jiidan biyaha oo kale. Laakiinse waxa dhacda in mararka qaar in dhuunta ama tubadu ay kala go’do sidaasi darteedna darteedna biyihii aanay soo gaadhin meeshii looga baahnaa. Sidaasoo kale, marka ay kala go’aan waxyaabaha uu Ilaah bixinayo, waxa inagu waajib ah inaan u jeedsano meesha ay ka imanayso farxaddu oo ah Eebbe.

Haddaba marba marka danbaysa waxa kordhaysa aqoonta ay rumaystayaashu u leeyihiin inuu Eebbe yahay kan asalka u ah farxadda, xagga janadana sidoo kale Isaga oo keliya ayuunbaa farxadda asal u ah: *“Oo dhexdeedana macbud kuma arag; waayo, Rabbiga ah Ilaaha Qaadirkaa iyo Wanka ayaa waxay yihiin macbudkeeda. Oo magaaladuna uma baahna qorrax iyo dayax toona inay dusheeda ka iftiimaan; waayo, ammaanta Ilaah ayaa iftiin u ahayd, oo laambadeeduna waa Wanka.”* (Muujintii 21:22-23).

Xitaa dhulka ama dunidan aan joogno korkeeda waxa aan ku arki karnaa in farxaddani ay tahay mid ku jirta oo ka imanaysa Ilaah oo keliya.

Sayid Ciise Masiix waxa uu soo koobayaa waxyaalaha aan aan kusoo baranay cutubkan isaga oo leh **“Boqortooyada Ilaah dhawrid ku iman mayso. lamana odhan doono, Waa tan! ama, Waa taas! waayo, bal eega, boqortooyada Ilaah waa idinku dhex jirtaa.”** (Luukos 17:20-21).

Rumaytayaashu waxa ay rabaan inay galaan boqortooyada Ilaah, laakiinse boqortooyada Ilaah iyaga dhexdooda ayay joogtaa. Waxa ay garanayan iyagoo noloshan dhexdeeda ku dhadhamiya boqortooyada Ilaah, inay xoojinayso inay si buuxda u tijaabin doonaan ama u arki doonaan. Hadda wakhti xaadirkan la joogana, waxkasta oo ay Ilaah ka aqoonsadaani waxa uu siinayaa raalli ahaanshiiyo buuxa, maxaa yeelay Masiixu marnaba kama daalayo inuu iyaga baahiyohooda daboolo.

Laakiin noocan ka midka ah farxaddu ma’aha mid dhaboobaysa ilaa uu qofku ka helo nabad ku dhex jirta isaga, taasi oo ka dhigan sida qoyska faraxsan ee nabadda ku dhex haysta guriga oo kale. Haddaba qofka aan rumaysadka lahayni kuma dhex jiro nabad, sidaasi darteedna ma’aha suurto gal inuu faraxsanaado, waxaanu ka dhiganyahay sidii qoys dhibaataysan oo sababtuna ay tahay xubnaha qoyskaas oo markasta ku sugan muran iyo is haysad.

- I. Rumaystayaashu waxa ay garawsanyihiin in joogitaanka nabaddan iyo farxaddan iyaga ku dhex jirtaayi, ay caddayn u tahay inay jannadana ku heli doonaan nabad iyo farxad. Garashada xaqiiqadani waxa ay kuwo ka mid rumaystayaashu u suurto gelisay inay ku dhintaan si geesinimo leh halkii ay ka diidi lahaayeen iimaanka ama rumaysashada, taasina waxa weeyi iyaga oo daalacday joogitaanka jannada. Rasuul Bawlos ayaa waxa uu qoray ereyadan: *“Sidaa daraaddeed qalbi jabi mayno, laakiin in kastoo nin kayaga dibadda ahu uu kharribmayo, weliba kayaga gudaha ahu maalin kastuu cusboonaanayaa. Waayo, dhibtayada fudud ee wakhtiga yar ah ayaa aad iyo aad noogu. sii yeesha culayska ammaanta ee weligiis ah. Ma fiirsanno waxyaalaha la arko, laakiin waxyaalaha aan la arkin, waayo, waxyaalaha la arko in dhawr ah ayay sii joogaan, laakiin waxyaalaha aan la arkini weligood bay sii joogaan.”* ( II Korintos 4:16-18).

Haddaba cutubka kan xiga ayaa waxa aan kaga hadli donna sababta ay rumaystayaashu u rumaysan yihiin in Ilaah uu oofin doono ama dhammaystiri doono wixii uu ballan qaaday.



Su'aalaha Cutubyada Koowaad iyo Labaad

-Waamaxay sababaha aanad noloshaada uugu qanacsanayni? Ku kalsoonow oo aamin u noqo naftaada!

-Qanacsanaantu waa sifo ka mida sifooyinka Ilaah, waxaana weeyi hibo qaaliya oo uu siiyo carruurtiisa. Haddaba sideed u fahansantahay dabeecadda qanacsanaantan?

Cutubka labaad waxa uu ka hadlayaa in qanacsanaanta Masiixiyaddu ay tahay sir ama qarsoodi wayn, iyo inay tahay wax aanu fahmi karin qofka aan rumaysadka lahayni. Haddii aan haddaba doonayno inaan aamin noqono waxa lagama maarmaan ah inaan qirano iyada oo kuwo badan oo rumaystayaasha ka mid ahi aanay garanayn sirtan ama qarsoodigan, haddaba waa maxay sababtu? --Waa maxay xidhiidhka u dhexeeya qanacsanaanta Masiixiyadda iyo ballanka ammaanta in la muujiyo?

“Farxadda Masiixiyaddu ...kuma timaaddo in la helo waxa badan, laakiin waa doonisteenna oon koobno.”

-Sidee ayaa ay suurgo gal u tahay inaan u dhinno doonisteenna?

Haddii aan rumaystaal aan nahay sidee ayaa waxa aan rabno ama aan filaynaa uu uga duwanaa karaa waxyaabaha ay rabaan ama ay filayaan kuwa aan rumaysadka lahayn ee ka midka ah qaraabadeenna, saaxiibaddeen iyo jaarkeenna?

-Waa maxay xidhiidhka u dhexeeya qanacsanaanta iyo Ilaah ka cabsigu?

Adigoo ku salaynaya jawaabaha aad su'aalahan kor ku xusan kaga jawaabtay,

-waa maxay isbedellada aad u baahantahay inaad ku samayso qaab nololeedkaaga?

## CUTUBKA SADDEXAAD

### Ballanqaadyada Ilaah:

Ilaah waxa uu siiyay ballanqaadyo waawayn midkasta oo rumaysta Ciise Masiix. Haddaba iyadoo si dhaba oo la aaminsanyahay looga fikiro wixii Ilaah ballanqaaday, waxa ay middaasi rumaystaasha u keenaysaa farxad.

Eebbe waa baarri oo marnaba iskama indho-tiri karo dembiga, hase ahaatee waxa weeyi sidoo kalena Ilaah jacayl ah oo wax jecel, sidaasi darteedna waxa uu u naxariistaa dembiilayaasha Isaga oo markaasna doonay inuu iyaga ka badbaadiyo ciqaabka ay mutaysteen. Maadaama oo haddaba aanay iyagu awoodaynin inay is badbaadiyaan, waxa uu Ilaah go'aansaday inuu caawiyo, oo u naxariisto isla markaasna qaarkood uu badbaadiyo, sidaasi darteedna waxa uu soo diray Madigiisa oo ah Sayid Ciise Masiix oo aqbalay inuu noqdo aadane, Isaga oo markaasna noolaanaya nolol uu si dhammaystiran ugu addeecayo Ilaah, taasi oo loo tiriyay dadka Ilaah. Sayid Ciise Masiix waa la dilay iyada oo iskutallaabta lagu kor qodbay, Isaga oo dhabarka u ritay ciqaabtii ay dadka Ilaah ku kasbadeen dembiga aawadiis.

Haddaba waxaynu odhan karnaa Ilaah waxa uu ballanqaaday inuu addeecitaanka Masiixa u tiriyo dadka rumaystayaasha ah, si uu iyaga uga kor qaado dembiyadooda Isaga oo guudka ka saaraya Masiixa, iyo inuu iyaga siiyo Nolol Weligeed ah. Ruuxa Quduuska ahi waxa uu iyaga siinayaa nolol cusub Isaga oo u suurto gelinaya inay rumaystaan Sayid Ciise Masiix,

waxaanu siinayaa rumaysashada badbaadada Isaga oo isla markaasna siinaya xoogganaan ay kaga adkaadaan awoodda dembiga.

Ballanqaadyada Ilaah waxa ay ku yimaaddeen nimcadiisa, taasina waxa ay ka dhigantahay in la siiyay kuwo aan mutaysanin, oo waxkasta oo Ilaah uu ballanqaadaana waa mid weligiis jiraya. Dhimashada Masiixu waxa ay dadkiisa u diyaarisay badbaadada hubaasha ah ee weligeed ah, oo uma daynayo inay halligmaan. Ballanqaadyada waxa dadka rumaystayaasha ah loo siiyaya keli keli, oo waxkasta oo Ilaah ballanqaadana waxa uu midkastaba u siinayaa goonidiisa.

Ballanqaadyada uu Ilaah bixiyay waxa weeyi dhiirri geliyaha ugu wayn ee ay haystaan rumaystayaashu, waayo waxa uu ballanqaaday inuu badbaadin doono dadkiisa, taasina waa midda iyaga siinaysa inay dareemaan nabadgelyada iyo farxadda aadka u sarraysa. Waxa kale oo uu ballanqaaday in iyaga aanu Shaydaanku ka adkaan doonin, taasina waxay sidoo kale siinaysa dareenka nabadgelyo, xitaa marka ay la soo dersaan dhibaatooyinka iyo niyad jabku. Marka uu mustaqbalka mugdi ku jirana, waxa ay yihiin kuwo faraxsan oo ku kalsoon in ballanqaadyada Ilaah aan la tirtiri karin ama meesha laga saari karin. Nabi Daa'uud waxa uu si buuxda uu ugu kalsoonaa Ilaah isaga oo markaasna garanayay in Ilaah uu fulin doono ama ka dhabayn doono wixii uu sheegay: *“Sida runta ah reerkaygu xagga Ilaah saas kuma aha; Laakiinse axdi aan weligiis dhammaanayn ayuu ila dhigtay, Oo wax kastaba wuu hagaajiyey, wuuna adkeeyey; Oo in kastoo uusan soo bixin weliba waa badbaadadayda oo dhan iyo doonistayda oo dhanba.”* (II Samuu'eel 23:5).

Haddaba rumaystayaasha wakhti xaadirkan joogaana waxa si kabadan xilligii Nabi Daa'uud ay u haystaan sababaha u suurto gelinaya in Ilaah uu oofin doono ballanqaadkiisa, maxaa yeelay marka ay u fiirsadaan waxyaalihii uu Sayid Ciise qabtay, waxa ay arkayaan iyadoo ka dhabaysay waxyaalihii uu Ilaah hore usii ballanqaaday. Axdiga Hore dhexdiisa waxa ay ahayd in dadka reer bani Israa'iil ay farxaan, maxaa yeelay Ilaah waxa uu ballanqaaday inuu dadkiisa u wanaagsanaan doono. Rumaystayaasha maanta wakhti xaadirkan joogaana,

waa inay ku farxaan waxyaalaha ugu waawayn ee Ilaah uu shakhsi walba u sameeyay. Akhri Cutubka-(Cibraaniyada 8aad).

Ballanqaadista badbaadada waxa kale oo barbar socda isla markaasna Ilaah uu ballanqaaday waxyaalo kale oo badan oo wanaagsan. Ballanqaadyadanna waa in lagu fahmo iftiiminta ballanqaadyada waaweyn ee ku saabsan badbaadada uu Ilaah ballanqaaday. Ma'aha inaan aaminno ama rumaysano in fasiraadda xaraf ahaanta ahi ay tahay midda ay koobsanayaan ballanqaadyadani. Tusaale ahaan Sabuurka 91, waxa uu koobayaa ballanqaadyada ah in kii ka cabsada Ilaah aanay lasoo gudboonaan doonin ama aanu ka caban doonin xanuun, shilal ama dhibaato. Haddaba, rumaystaaysha ka cabanaya xunuunnada ayaa waxa laga yaabaa inay is wayddiiyaan haddii ay ka mid yihiin kuwa uu tilmaamay Sabuurkani iyo inkale. Waxaana suurto gal ahayd in reer bani Israa'iil ay cudur daar ugu noqon kartay filashada barakooyin maaddi ah oo ku imanaya addeecitaanka aawadii. Waxaanu haddaba shaki ku jirin in barakooyinka la ballanqaaday iyo inkaarta digniinta ah ee ku sugan sharcigii Nabi Muuse ay tusinayso in arrintu sidaas ahayd, laakiinse ballanqaadka ku sugan aayadaha 9 iyo 10 ee Sabuurka 91 waxaa ku qoran sidatan oo an idinkaga soo xignay:

*“Waayo, waxaad tidhi, Rabbigu waa magangkayga, Oo Kan ugu sarreeya ayaa degmadayda ah. Shar kuguma dhici doono, Belaayona teendhadaada uma soo dhowaan doonto.”* Ma'aha in loo qaato in rumaystayaasha aanay xanuunsan doonin, balse waa in loo arko Isaga oo tusinaya oo baraya inay lahaadaan kalsooni, taasoo ah inuu Ilaah iyaga si joogto ah u daryeelayo uguna dhowrayo sharka. Waxa uu Ilaah adayga iyo dhibaataada uu ugu keeni karaa edbin aawadeed sida uu aabbuhuba u edbiyo carruurtiisa oo kale, taasina waxa ay muujinaysaa inay yihiin carruurta Ilaah. Eebbe waxa uu xaq u leeyahay inuu iyaga siiyo wixii

iyaga u wanaagsan ee ku habboon, waxaanu ka qaadayaa wixii aan iyaga ku habboonayn, oo markastana waxwaliba waa mid iyaga u khayr badan. Haddii markaas uu ku dhaco waxay u arkaan inuu dhibayo, waa inay hubiyaan in waxkastoo ku dhacayaa uu yahay qayb ka mida qorshaha Ilaah ee iyaga u wanaagsan, oo sidaasna iyaga uuguma qabsoomayso dhibaato run ahi ama dhibaato ruuxi ah ah, amaba dhibaato daa'imis ahi.

Waxa ka mida ballanqaadyada Axdiga Hore ee ay suurto galka tahay in rumaystayaashu ay nafhooda ku dabaqaan, ballanqaadka lagu sheegay Ishacyaah 43:2 iyo Yashuuca 1:5. Qoraaga Cibraaniyada ayaa waxa uu si xooggan ugu soo xiganayaa ballanqaadka ku sugan Yashuuca, taasi oo ka dhigan iyadoo Ilaah uu leeyahay:

*“Sinaba kuu dayn maayo, oo sinaba kuu dayrin maayo”* (Cibraaniyada 13:5).

Haddaba, sidaas ayaa Ilaah uu u bixiyay ballanqaadyadan, Isaga oo sidoo kalena bixiyay kuwo kale oo badan oo la mid ah, dhammaanba ballanqaadyaduna waxa ay tilmaamayaan boqortooyada, waxaanay ina barayaan in qayb ka mida farxadda aynu ku heli doonno janada halkan lagu heli karo oo hadda lagu nasan doonnikaro, waxaanay ka dhigantahay sidii doon yar oo ku dhex jirta bad kacsan oo kuwa saaranina ay ku fikirayaan gaadhitaanka berriga.

## CUTUBKA AFRAAD

### Ku Biir Dugsiga Farxadda:-

Cutubkan dhexdiisa waxa aynu ugu soconaynaa dhinaca dugsiga, laakiinse uma tigayno inaan barano xisaab ama saynis ama juquraafi, laakiin waxa weeye dugsiga uu Masiixu macallin ka yahay, kaasi oo uu inagu barayo sida aan ku noqonayno kuwo faraxsan, waxaan dugsigan dhexdiisa ku baran doonnaa toban cashar. Haddaba rumaystayaasha barta ama xafida casharradani, waxa ay arki doonaan iyaga oo waxkasta oo ku dhacaba noqon doona kuwo faraxsanaada. Waxa kale oo la rabaa inaan xasuusnaanno iyada oo Masiixu aanu ahayn macallin oo keliya, laakiinse noloshiisa ayaa dhinac walba waxa ay ka tahay tusaalaha ugu wanaagsan ee farxadda.

Casharka (1aad) –

Dayri Shakhsiyaddaada!

Inaad noqoto rumayste waxa ay qaadanaysaa qiime wayn, rumaystayaasha middaas waxaan ahayn sheeganayaana waa kuwo aan run sheegaynin.

Ciise Masiix ayaa midan aad u caddeeyay, waxaanu yidhi: *“Mid uun hadduu doonayo inuu iga daba yimaado, ha is-inkiro, iskutallaabtiisana maalin walba ha soo qaato oo ha i soo raaco. Waayo, kan doonaya inuu naftiisa badbaadiyo, waa lumin doonaa, laakiin kan naftiisa u lumiya aawaday, kaasaa badbaadin doona.”* (Luukos 9:23-24).

Haddaba, Masiixa qudhiisa ayaa waxa uu rumaystayaasha barayaa sida ay naftooda u dayrin karaan, waxaanu barayaa inay yihiin kuwo aan mutaysanin naxariista ama wanaagga Ilaah, laakiinse Ilaah waxa uu ka cadhooday dembigooda, oo iyaguna gargaarka Ilaah la'aanteed waxba ma samayn karaan. Marka laga qaado waxyaalaha ay ku naaloonayaan, waxa ay garanayaan inaanay Ilaah waxba ka mutaysanin, waayo inyar mooyee badanaa Isaga dartiis uma shaqeeyaan. Sidoo kele Masiixu waxa uu iyaga baryaa inay yihiin dembiilayaal, iyada oo dembigooduna uu gaadhsiisanyahay heer ay ku fasahaadinayaan wixii uu iyaga siinayay, laakiinse sidaas oo ay tahay iyaga waa uu barakaynayaa, oo wuxuu u suurto gelinayaa inay waxyaalahan si wanaagsan u adeegsadaan, balse haddii uu faraha ka qaado, waxa ay garanayaan inay waxyaalahan adeegsigooda ay kharribayaan. Waxa kale oo uu barayaa, marka ay dhintaan wixii ay faleen ma'aha mid lumaya ama baaba'aya, maxaa yeelay Ilaah

waxa uu awoodaa inuu kiciyo midkale oo hawsha halkaas ka sii wada. Fahmitaanka waxyaalahani waxa weeyi midda loogala jeedo dayrinta nafeheenna, sidaasi darteedna waa inaan aad u dadaalno si aan u garano baadideenu inta ay le'egtahay. Marka sidaas la sameeyo waxa dhacaysa in dhibaato kastaa ay u muuqato mid yar, halka barako kastaana ay u muuqanayso mid weyn.

Casharka (2aad) – Masiixa oo Shakhsiyaddiisuu Dayriyay:-

*Ma jiro qof shakhsiyaddiisa u dayriyay sida uu Masiixu shakhsiyaddiisa u dayriyay oo kale. Ishacyaah ayaa waxa uu Isaga ka qoray wax sii sheegiddan: "Isaga waa la dulmay, waana la dhibay, laakiinse innaba afkiisii ma uu kala qaadin. Isaga sidii wan la qalayo baa loo kexeeyey, oo sidii lax ku aammusan kuwa dhogorta ka xiira hortooda, isagu afkiisa ma uu furin."* (Ishacyaah 53:7). Ishacyaah waxa uu sii sheegay wax ku saabsan Masiixa iyo sida uu kafaarogud uu ugu noqon doono dembiyada dadkiisa. Sidoo kale Rasuul Bawlos ayaa waxa uu Masiixa ka qoray ereyadan: *"laakiinse wuu ismadhiyey, oo wuxuu qaatay addoon suuraddiis, oo wuxuu noqday mid dad u eg, oo markuu nin u ekaaday, ayuu is-hoosaysiiyey oo addeecay inuu dhinto, xataa inuu iskutallaabta ku dhinto."* (Filiboy 2:7-8).

Waxyaalahaas oo dhammi iyagoo jirana waxa uu ahaa qofka ugu wayn ee noolaada Isaga oo qanacsan isla markaasna raalli ah. Haddaba, markasta oo ay kordhaan rumaystayaasha raacaya tusaalihiisa ah in la dayriyo shakhsiyaddu, waxa badanaysa farxaddooda. Masiixu waxa uu ku farxay inuu fuliyo doonista Aabbihiis, rumaystayaashana waxa laga raba inay bartaan in halka ay kuwa nafhooda oo qudha ka fikiraa ka farxayaan marka uu Ilaah u sameeyo waxa ay rabaan, in kuwa dayriya shakhsiyaddooduna ay ka noqonayaan kuwo ku farxa dhammaanba waxkasta oo Ilaah uu sameeyo.

Casharka (3aad) – Ilaah La'aantiis Lama Dhergayo:-

*"Wacdiyuhu wuxuu leeyahay, Waa wax aan waxba tarayn, waa wax aan waxba tarayn, wax waluba waa wax aan waxba tarayn. Bal maxaa faa'iido ah oo nin ka hela hawshiisa uu qorraxda hoosteeda ku hawshoodo oo dhan?"* (Wacdiyihii 1:2-3).

Kuwa aan ku farxin waxyaalaha dunidan laga helayo, farxad la'aantoodu kama dhigna sida ay u arkaan inaanay helin wax ku filan, laakiinse waxa weeyi iyada oo waxyaalaha dunidan laga helayaa aanu keenaynin farxadda. Augustus oo ahaa caalim faqii ah ayaa waxa uu qoray: *"Ilaahow adigaa na abuurtay, oo qalbiyadayaduna ma helayaan raaxo ilaa ay adiga kugu dhex sugnaadaan"*. Kuwa niyad jabsan ee u malaynaya markasta oo ay helaan waxbadan inay dhergi doonaan, waxa ay ka dhigan yihiin sida dad gaajaysan oo u malaynaya waxa afkooda buuxinayaa inuu gaajo tirayo.

*"Haddaba bal maxaad lacag ugu bixisaan wax aan cunto ahayn? Oo wixii aad ku haw shooteenna maxaad ugu bixisaan wax aan idin dherjinayn?"* (Ishachaah 55:2). Ma jiro wax la heli karo oo Ilaah ka fogi.

Casharka (4aad) – Dhergitaanku Wuxuu ku jiraa Masiixa:-

Ciise Masiix waxa uu ina baray in Isagu uu yahay kan dadka siiya farxadda runta ah. Waxa uu yidhi: *"Anigu waxaan ahay kibista nool ee samada ka soo degtay. Haddii qof uun kibistan cuno, weligiis wuu noolaan doonaa. Oo kibistaan siin doonaa waa jidhkayga, nolosha dunida aawadeed."* (Yooxanaa 6:51).

Markalena waxa uu yidhi Sayidku: *"Haddii qof uun harraado, ha ii yimaado, hana cabbo. Kii i rumaysta, calooshiisa waxaa ka duuli doona webiyo biyaha nool ah,"* (Yooxanaa 7:37-38).

Haddaba, kibista iyo biyuhu waxa weeyi baahida ugu muhiimsan ee jidhkeennu u baahida qabo. Ciise Masiix waxa uu barayay inuu isagu yahay dhergiyaha baahiyaha asaasiga ah ee naftu u baahida qabto, waana sida uu Ishacyaah hore usii sheegay: “Bal aad ii maqla, oo waxa wanaagsan cuna, oo naftiinnuna ha iskaga istareexdo barwaaqo miidhan.” (Ishacyaah 55:2). Ciise Masiix waxa uu dadkiisa u ballanqaaday inay heli doonaan nolol wanaagsan iyo inay ahaan doonaan kuwo farxaddoodu buuxsanto (Yooxanaa 10:10, 16:24).

Casharka (5aad) – Ahow Dalxiise iyo Dagaalyahan ah:-

Rumaystayaashu waxa weeyi dalxiisayaal dunidan ka gudbaya, iyaga oo markaasna ah kuwo ku sugan teendho gumeel gaadha oo jidhkooda ah, oo markaasna u diyaar garoobaya nolosha weligeed ah marka uu Ilaah iyaga nolosha labaad u sarakiciyo. Sidaas awaadeed waxa nacasnimo ah in jidhkoodu uu ahaado mid u murugoonaya waxyaalaha dunidan korkeeda yaalla. Waxa aan Cibraaniyada 11 ka akhrin karnaa “*oo waxay qirteen inay dhulka ku ahaayeen shisheeyayaal iyo dad sodcaal ah...laakiin imminka waxay aad u doonayaan waddan ka wanaagsan oo ah jannada, sidaas daraadeed Ilaah ka xishoon maayo in loogu yeedho Ilaahood, waayo, wuxuu iyaga u diyaariyey magaalo.*” (Cibraaniyada 11:13, 16), waxaana waajib ah in rumaystayaashu ay bartaan inay sidan u fikiraan. Dadka musaafiriinta marka ay waddankooda ka fogyihiin waxa ay aqbalaan dhibaatooyinka la kulma sida cuntada oon munaasib ku ahayn ama dhibaatooyinka safarka ee adag, sidaasoo kalee ayaa rumaystayaasha ay ka dhiganyihiin oo waxa ay leeyihiin waddan ay weligeed ku noolaan doonaan, oo dhibaatooyinka ay dhulka kala kulmayaanna ma’aha mid aad u dhibaysa.

Rumaystayaashu sidoo kalena waa dagaalyahanno. Rasuul Bawlos ayaa Timoteyos waxa uu u qoray: “*Dhibaato ka qayb qaado sida askari wanaagsan oo Ciise Masiix.*” (II Temoteyos 2:3).

Askarigu marka uu ka fogyahay gurigiisa ee uu ku jiro tababar ama hawlgal ciidan, ma filanayo inuu ku raaxaysto waxa raaxo ah ee gurigiisii u yaalla. Sidaa oo kale ayaa rumaystayaashuna waxay yihiin askar la dagaallamaysa Shaydaanka oo ah cadowga nafhooda, sidaas darteedna waa inay noqdaan kuwo u diyaara dagaalka, waxaana la rabaa inay xasuusnaadaan in nolosha Masiixiyaddu ay ku jirto loollan dheer oo u baahan in lagu xammilo dhibaatooyinka. Haddaba halka aanu askari caadiga ahayni ka garanayn cidda ugu danbaynta ku guulaysanaysa dagaalka, waxa rumaystayaasha u suurto gal ah oo ay hubaan inuu Ciise Masiix u damaanad qaaday guusha kama danbaystaha oo ay heli doonaan.

Casharka (6aad) – Ku Raaxayso Wakhtiyada Wanaagsan:-

Waxkasta oo dunidan korkeeda yaalla Ilaah ayaa siiyay dadka si ay ugu raaxaystaan, waxaanay noqon karaan kuwo farxa haddii ay gartaan waxkasta oo ay haystaan inuu Ilaah agtiisa ka ahaaday oo ay Isaga ugu mahad naqaan marwalba. Rumaystayaashu marka ay arkaan waxkasta oo Ilaah abuuray waxay u arkayaan mid wanaagsan, sidoo kalena waxay arkayaan in Ilaah uu yahay mid wanaagsan, sidaas darteedna waxa Ilaah sameeyaa waxa uu iyaga ka dhigayaa kuwo faraxsan. Laakiinse waxa weeyi inay ogaadaan in waxa ay haystaan ee hanti ahi aanu ahayn waxa ugu muhiimsan ee Ilaah uu siiyay, waana inay diyaar u noqdaan ka kaaftoomitaankiisa haddii middaasi ay tahay waxa Ilaah uu rabo. Waxa uu Ilaah uugu yeedhi karaa iyaga inay adeegaan wakhtiyo adayg badan, ama waxa uu ka dalban karaa inay uugu adeegaan duruuf wanaagsan dhexdeeda, markaasna ujeeddadiisu waxa weeyi inay ku raaxaystaan waxyaabaha wanaagsan ee iyaga uu Ilaah siinayo. Ilaah waxa uu iyaga u doorayaa waxa iyaga u wanaagsan, waxaana laga rabaa in middaas ay iyaguna ku farxaan.

Marka shaqaaluhu uu diido shaqo kale oon ka ahayn shaqadiisa isla markaasna uu maamuluhu ka dalbaday, waxa hubaala in middaasi aanay raalli gelinaynin maamulka!

Casharka (7aad) – Garo naftaada:-

Rumayste kasta waxa ku waajib ah inuu naftiida baadho oo uu ogaado waxa uu gudaha qalbigiisa ka doonayo. Taasi waxa ay bari doontaa in duruufaha noloshiisu aanay ahayn midda sababta u ah farxad la'aantiisa, balse xaaladdu ay tahay qalbigiisa, oo sababta runta ah ee ka danbaysa farxad la'aantuna waxa weeyi dembiga. Rumaystaha naftiisa garanayaana waxa u suuroobaysa inuu dembiga bilowgiisa joojiyo oo uu aadna uu uga murugooda, laakiinse rumaystayaasha aan nafhooda garanaynini waxa ay yihiin kuwo halis ugu jiray inay ku timaaddo cabsi farabadani marka ay dhibaatooyinku yimaaddaan, oo waxa ay odhanayaan: “malaha Ilaah wuu na illaaway!” hase ahaatee haddii ay gartaan inay u baahanyihiin is dhuldhig ama is-hooseysiinta, waxa ay fahmi lahaayeen in Ilaah uu dhibaatooyinka iyo imtixaanka uu ugu soo dirayo si uu u edbiyo. Dawada keenaysa dhibaataadu waa midaan loo baahnayn, waxaanay middaasi sabab u noqon kartaa badbaadada noloshada, sidoo kalena imtixaan keeni kara cidhiidhi ayaa waxa uu noqon karaa mid kaa ilaaliya dembiga.

Marka uu rumaystuhu korodhsado garashada naftiisana, waxaa sii wanaagsanaanaysa salaaddiisa. Rumaystuhu aan bislayn ee aan fahmayn gudaha qalbiyadooduna waxa ay Ilaah ka baryaan waxyaalo aan waxtar lahayn, oo marka ay heli waayaan dhammaan waxa ay rabaanna waa ay niyad jabaan.

Casharka (8aad) – Ka Digtoonow Qananimada:-

In badan ayaa dadka muminiinta ahi waxa ay jeclaadaan taajirnimada/ghananimada/ ama hantiilanimada oo mana arkaan dhibaata ay keento qananimadu. *“Waayo, jacaylka lacagtu waa xididka xumaatooyinka oo dhan, oo qaar intay higsanayeen ayay iimaankii ka ambadeen, oo waxaa muday tiiraanyo badan”* (I Timoteyos 6:10).

Waxa laga yaabaa kabaha cusubi inay yihiin kuwo qurux badan oo indhaha soo jiidanaya, hase ahaatee waxa laga yaabaa inay qabanayaan ama goynayaan qofka xidhan, sidoo kalena magaalo waxa ay noqon kartaa mid dusha ka qurux badan, laakiin dadka dhex degani waxa ay garanayaan kudaafadda dhex taalla xaafadaha dadaka saboolka ah ay ka degan yihiin magaaladaas dhexdeeda, sidaasoo kalena dadka hantillayaasha ahi waxa ay u muuqanayaan kuwo hodan ah, hase ahaate waxa dhici karta inay gudaha ka murugaysan yihiin.

Dadka hodanka ah ama dadka caanka ahi, waxa dhacda in badanaa ay soo foodsaraan dhibaatooyin iyo murugooyin, waayo waxa hodantinimadu ay ku keeni kartaa dhibaatooyin qofka gelin kara jarribaad. Ciise Masiix waxa uu sheegay in kuwa hantida leh ama hodanka ah ay ku adagtahay gelitaanka boqortooyada Ilaah, waxa kale oo intaas ka sii badan iyada oo kuwa hodanka ah iyo kuwa caanka ah maalin maalmaha ka mida Ilaah hortiisa lagu xisaabin doono iyada oo la wayddiin doono sida ay u adeegsadeen hodantinimadooda iyo caannimada magacooda.

Casharka (9aad) – Ka Digtoonow Xaqiijinta Danahaaga oo keliya:-

Qaybo badan oo ka mid ah Kitaabka Quduuska, waxa aan ka akhrin karnaa dad helay waxyaalaha ay raadinayeen. Marar badan dadku waxa ay doonaan waxyaalo dantooda oo keli ahi ku jirto oo helitaankooduna aanu waxba u faa'idaynaynin, sidaas darteedna marka Ilaah uu siiyo waxa ay doonayaan waxa uu ku noqdaa ciqaab: "" (Sabuurka 81:11,12).

Barnard (1090-1153), oo madax ka ahaa Kalerfo ayaa waxa uu yidhi: "Rabbiyow ha ii ogolaan murugadan oo kale! Haddii aad isiiso waxkasta oo qalbigaygu doonayo, taasi waxa ay igu noqonaysaa ciqaabka iigu badan dunida dhexdeeda". Innaga oo garana in doonisteenna dabiiciga ahi ay tahay mid inagu keeni kartta baadi, ayaa waxa ay tahay casharka ugu adag ee laga baran karo dugsiga Masiixa, sidoo kalena waxa weeyi casharka ugu muhiimsan.

Casharka (10aad) – Eebbe ayaa Waxkasta Maamulaya:-

Ilaah waxa uu maamulaa gebi ahaanba caalamka, taasina waxa ay ka dhigantahay in waxkasta oo dhacaya faahfaahintiisu uu hoos tegayo maamulkiisa, sidaas darteedna waxkasta oo ku dhacaya rumaystayaashu waxa weeyi mid ku timid doonistiisa uu iyaga la rabo, waayo Isagu waxa uu arkayaa in middani iyaga u wanaagsantahay. Haddaba Masiixu ardaydiisa ayaa uu dhiirri geliyay Isaga oo leh:- *"Shan shimbirrood miyaan laba beesadood lagu iibin? Oo midna lagama illaawin Ilaah hortiisa. laakiin timaha madaxiinna oo dhan waa tirsan yihiin. Ha baqina; waad ka qiima badan tihiin shimbirro badan."* (Luukos 12:6, 7).

Waxa lagama maarmaan ah in rumaystayaashu ay Ilaah ka baryaan inuu kordhiyo iimaankooda si ay Isaga uga fikirano oo ay u dabaraan waxkasta oo iyaga ku dhacaya. Waxaana iyaga ku waajib ah inay xasuusnaadaan inaanay fududayn fahmitaanka waxkasta oo iyaga Ilaah uu u samaynayo, oo waxa ay garanayaan waa in Ilaah uu leeyay doonis uu rabo inuu ku dhammaystiro noloshooda. Muddo labaatn sanadood ah waxa dhacaya ayaa ku kooban usbuucan, haddii markaas ay waajahaan doonista Ilaah ee usbuucan waxa uu fahmayaa inay waajahayaan doonistiisa dhammaanba waxyaalaha ka imanaya usbuucan.

Ilaah siyaabo kala duwan ayuu u shaqeeyaa, si markaas rumaystayaasha ay ugu farxaan waxyaalaha samaynayo, waa inay wax ka fahmaan qaabka Ilaah u shaqeeyo. Haddaba waxa jirta labo siyaabood oo ay u baran karaan qaabka Ilaah u shaqeeyo:

Ugu horrayn: waxa dabiici ah in dadka Ilaah ay dhibaatoodaan ama xanuunsadaan. Kuwa aan rumaysadka lahayni waxay u malaynayaan, haddii Ilaah uu run ahaantii jiro, oo dadkaasina ay yihiin dadkiisa, waa maxay sababtay ay u dhibaatoonayaan? Haddaba middaas ka soo horjeedkeeda ayaa sax ah, oo xaqiiqada ay u xanuunsanayaan waxa weeyi iyaga oo ku abtirsada Masiixa, taasina waa midda uu qoray Butros: *"Gacaliyayaalow, ha la yaabina jirrabaadda dabka ah oo idinku dhex dhacday in laydiin tijaabiyo sida iyadoo ay idinku dhaceen wax la yaab lihi. laakiinse sidaad u tihiin kuwo ka qayb qaatay waxyaalaha Masiixu ku xanuunsaday. farxa, inaad farxad aad u weyn ku faraxdaan marka ammaantiisa la muujiyo."* (I Butros 4:12, 13).

Marka labaad: Ilaah waxa uu sharka ka soo dhex saari karaa khayr. Marar badan ayaa Ilaah waxa uu dadkiisa geliyaa jarribaado adag inta aanu iyaga samafal wayn u samaynin ka hor. Tusaale ahaan Nabi Yuusuf waxa uu ahaa maxbuus intii aanu noqon xaakinka Masar ka hor, sidoo kalena Nabi Daa'uud waxa uu ahaa mid la eryay intii aanu Israa'iil u noqon boqor ka hor. Sayid Ciise Masiix laftiisuna waa uu xanuunsaday oo dhintay intii aanu ka sara kicin dhimashada eenu ammaanmin ka hor. Luther ayaa waxa uu yidhi: "Ilaah ayaa hoos wax udhiga si uu kor ugu qaado, sidoo kalena waxbuu dilaa si uu u nooleeyo, oo waxbuu jebiyaa si uu u sharfo."

## CUTUBKA SHANAAD

### Abaal marinta Ilaah:-

Cutubkan waxa aan ku baran doonnaa waxyaalaha rumaystaha faraxsan ka dhigaya shakhsi barakaysan.

Ugu horrayn: Rumaystayaasha faraxsani waxa Ilaah ay u caabudaan sida loo baahanyahay in loo caabudo. Cibaadada runta ahi ma'aha oo keliya iyada oo la isugu yimaaddo goobaha cibaadada ama salaad badan lagu soo celceliyo, waayo waxa suurto gal ah inaan samayno waxyaabo tusin kara cibaado laakiinse ka imanaya qalbi aan qanacsanayn oo inaga dhigi kara kuwo aan Ilaah gebi ahaanba caabudin. Ilaah waxa uu rabaa in rumaystayaashu ay Isaga ku caabudaan waxkasta oo ay haystaanba iyo gebi ahaantooda, markaas ayaanay Isaga raalli gelinayaan oo ay si saxa u caabudayaan. Cibaadadu waxa weeye micno inaga oo samayna waxa Ilaah uu doonayo, sidoo kalena cibaadadu waa inaga oo raalli ku noqona waxa Ilaah ina siiyo, waayo cibaadada iyo farxaddu waxa ay yihiin kuwo is dhinac socda.

Marka labaad: Rumaystayaasha faraxsani waxa weeye kuwa sida ugu habboon u adeegsanaya hibooyinka ama haddiyadaha ruuxiga ah ee Ilaah uu bixiyo.

Ilaah waxa uu iyaga siiyay iimaanka, is-hoosaysiinta, jacaylka, samirka, xikmadda iyo rajada, waxaanu rabaa inuu arko iyada oo waxyaalahani ay ku dhex korayaan dadkiisa, maxaa yeelay nololsha rumaystayaasha faraxsani waxa ay saamayn wax ku oola ku yeelataa kuwa aan rumaysadka lahayn.

Tusaale ahaan, dadka marka ay dhibaataadu la soo deristo aan murugooni waxa weeyi dad aan caadi ahayn, oo rumaystayaasha sidaas u dhaqmaana waxa ay noqonayaan tusaale wanaagsan oo Ilaah ammaanaya.

Marka saddexaad: Sidii horeba aan usoo aragnay waxaan odhan karnaa rumaystayaasha faraxsani waxa ay ammaanaan Ilaah. Dabiicaduna waxa ay ammaanta Ilaah, maxaa yeelay Isaga ayaa abuuray, oo rumaystayaasha ilaashanaya farxaddooda inkasta oo ay soo food saarto jarribaaddu, waxa ay yihiin kuwo Ilaah ammaanaya, maxaa yeelay Isaga ayaa middaas u suurto geliyay. Marka kuwa aan rumaysadka lahayni ay arkaan rumaystayaasha oo faraxsan wakhtiga cidhiidhiga lagu jiro, waxa ay ku qancayaan in iyaga Ilaah uu middaas u suurto geliyay.

Marka afraad: Ilaah waxa uu rumaystayaasha faraxsan u sameeyaa samafalka ugu wayn, oo marka ay rabaan inuu u samo falana, waa inay ahaadaan kuwo degganaansho ka muuqdo oo faraxsan, iyaga oon ahaanayn sida carruurta kuwa qayliya ilaa laga siiyo waxa ay rabaan. Waalidka xikmadda lihi marka uu ilmihiiisu qayliyo waxba ma siiyo ilaa inta uu ka degayo, sidoo kalena rumaystayaasha Ilaah wax ka barya ee dabeetana cadhooda marka aanay waxaas helin, waxa ay taasi ka dhigantay in Ilaah iyaga uu waxaas ka celinayo ilaa inta ay ka degayaan ee Isaga oo keliya ay u hoggaansamayaan, ka hor inta aanu siinin waxa ay u baahanyihiin. Maxbuuska xidhan ee silsiladaysani marka uu is waalwaalo ee uu qayliyo waxa keliya oo uu helaa waa iyadoo ay soo gaadhaan nabarro, oo waxa keliya ee ku waajibka ahi waa inuu aamuso oo uu is dejiyo si uu mid kale u sii daayo.

Marka shanaad: rumaystayaasha faraxsani waxa weeyi kuwa rumaystayaasha ugu faa'idada iyo waxtarka badan. Dadka warwarsan ee deganaanshuhu ka maqanyahay, waxa weeyi kuwo aan ku habboonayn u adeegitaanka Ilaah.



Inta aanu Ruuxa Quduuska ahi iyaga ka dejininna, waxa weeyi kuwo aan u diyaarsanayn u adeegitaanka Ilaah.

Rumaystayaasha oo dhan waxa loogu yeedhay inay Ilaah u adeegaan, oo looma yeedhin hoggaamiyayaasha ama kuwa tababarka gaarka ah leh oo keliya, sidaas darteedna lama rabo inay u maleeyaan inay yihiin dad caadiya oo aanay meeli aysan uga bannaanayn u adeegitaanka Ilaah, ama in adeegyada aan dadka indhohooda u muuqani, aanay ahayn kuwo lagu tirin karo u adeegitaanka Ilaah. Haddaba, waxa iyaga ka dhigi kara kuwo u heellan u adeegitaanka Ilaah, waxa weeyi raalli ahaansha ruuxi ahaaneed ee qalbiyadooda ku jira.

Marka lixaad: rumaystayaasha faraxsani waxa ay kuwa kale uga diyaarsanyihiin waajihitaanka jarribaadda, waayo kuwo murugada miidhan ah waxa u sahlan inay hore ka lumaan. Shaydaankuna waxa uu ka helaa in rumaystayaashu ay noqdaan kuwo walaac miidhan ah, oo marka ay dhibaato soo food saartana, waxa uu ku dadaalaa inuu iyagu ku qanciyo inaanay mutaysanin waxan ku dhacaya, ka dibna iyaguna waxa ay rumaystaan in arrintaasi ay sax tahay oo aanay ahayn in waxaasi ku dhacaan. Sidoo kale Shaydaanku waxa uu rumaystayaasha saboolka ah ku jarribaa inay wax xadaan, kuwa la dulmayna inay aargoostaan, laakiinse rumaystayaasha ku faraxsan waxa Ilaah keenay, waxa ay noqonayaan kuwo hor istaaga dhammaanba jarribaadaha noocan oo kale ah.

Marka toddobaad: Rumaystayaasha faraxsani waxa weeye kuwo nolosha si buuxda ugu qanacsan oo ugu naaloodo dunidan korkeeda.

Waxa dhacda mararka qaar in dadka aan waxyar mooyee waxkale haysani, ay yihiin kuwo ka farxad badan kuwo haysta wax badan, waayo waxa ay barteen sida ay ugu kaaftaamoon waxa agtooda yaalla ee ay haystaan, oo waxa ay ka dhigan yihiin sida ummad ku qanacsan waxa ay dhul haystaan, kuwaas oo ka farxad badan ummad kale oo dhul korodhsi aawadiis dagaallo u aafeeyeen.

Marka siddeedaad: Rumaystayaasha faraxasani waxa weeye kuwa arkaya abaalmarinta Ilaah uu ballan qaaday. Ilaah waxa uu mid kastaba ku abaal marinayaa waxa uu tabcado, oo rumaystayaasha waxa uu ku abaal marinayaa camalladooda wanaagga badan, iyo xitaa waxyaabaha ay niyadda ku qabteen inay sameeyaan eenay weli samaynin, sidoo kalena xumaanfalayaasha iyagana waxa uu ku abaal marinayaa camalladooda sharka miidhan ah, oo ay ka mid tahay waxyaalaha sharka ah ee ay maleegeen, oo ay ka mid yihiin xitaa kuwa ay fulin kari waayeen. Haddaba, rumaystayaasha u dhibaatoonaya Masiixa dartiisa iyaga oon jarribaadaas ka calool xumaanin, waxa ay noqonayaan kuwo aan waayin abaal marinta Ilaah.

Su'aalaha Cutubyada Saddexaad, Afraad iyo Shanaad

- Saamayn intee le'eg ayaa ay kugu yeelatay waxyaalaha aad u fiirsatay ee aad ka soo akhriday cutubyadan?

Cutubka Saddexaad waxa uu ku dardaarmayaa in ballanqaadyada Ilaah ay rumaystayaasha ka dhigaan kuwo faraxsan ama qanacsan.

- Haddaba adiga ma ku soo mareen wakhtiyo aad cidhiidhi dareentay, iyada oo taasna sababteedu ay tahay adoo u arkay in Ilaah aanu fulinin kuwo ka mid ah ballanqaadyadiisii?
- U fiirso Sabuurka 91, muxuu yahay mawqifkeenna aynu ka istaagi karno ballanqaadyada noocan ah?

- Sidoo kale sidee ayaa la inaga rabaa inaan ula falgalno mawqifyada loo arki karo inaanu Ilaah inoola dhaqmaynin, si waafaqsan ballanqaadyada eraygiisa?

Cutubka Afraad waxa aan ka helaynaa soo jeedinta qaab aynu nafteenna uga ilaalin karno murugada, taasoo ah inaan nafeheenna si saxa uga fikirno oo aynaan ku xeel dheeraan waxa aynu nafteenna ka soo qaadayno ama aynu mutaysano.

- Haddaba, waa maxay muhiimadda ku jirta inaan u fiirsano shakhsiyaddeenna marka laga eego dhinaca farxadda Masiixiyadda?
- Boqortooyada Ilaah oo aan garannaa sidee ayaa ay u noqon kartaa arrin asaasi u ah qanacsanaanta Masiixiyadda?

Injiilka Yooxanaa 4:13-14, Ciise Masiix waxa uu ku muujinayaa awoodda uu u leeyahay inuu oonka tiro, oo kii Masiixu ku jiraana waa inuu ku kaaftoomo Isaga.

- Haddaba xagga dhaqangelinta marka aan eegno maxaa middan loogala jeedaa?

Cutubka Afraad waxa aan ka dheeganaynaa iyada oo rumaytayaashu ay u baahanyihiin inay bartaan sidii ay ku noqon lahaayeen kuwo qanacsan, haddii markaas aynu ka soo qaadno in kaniisaddu ay tahay dugsiga aynu ku baranayno wax ku saabsan Masiixa,

- Sidee ayaa badhkeenba badhka kale uga caawin karaa waxbarashadan?

## CUTUBKA LIXAAD

### Dhibaatooyinka Walwalka:-

Shanta cutub ee ugu horreeya qormadaydan, waxa aynu dhinacyo kala duwan kaga soo eegnay farxadda Masiixiyadda, si aynu u garano waxa ay tahay iyo muhiimadda ku jirta. Haddaba, qaybta labaad ee qoramdeenna waxa aynu ku baran doonnaa sida loogu noolaado nololsha Masiixiyadda ee farxadda leh. Walwalka iyadoo waxkastaba laga arkayo dhinaca xumi, waxa weeyi mid liddi ku ah oo ka soo horjeedda farxadda. Waxa aynu haddaba cutubkan ku baran doonnaa xumaanta walwalka, waxaynuna garan doonnaa dhibkiisa ay dheertahay isagoo ah dembi, sidoo kalena cutubka toddobaad ayaan isna ku baran doonnaa wakhtiyada uu walwalku yahay mid khatar ah. Cutubka siddeedaad ayaa isna waxa aan ku arki doonnaa cudurdaarka aynu u samaysanno Walwalka. Haddaba marka aan waxyaalahaas aragno ayaa waxa suurto gal inoo noqon doonta inaan garano sida aan u helayno farxadda, iyo sida farxaddeenu u sugnaanayso.

Walwalku waxa weeyi arrin xun, waayo marka uu bilaabmo waxa sii korodha xumaantiisa. Walwalku waxa uu ka dhiganyahay sida nabar ama boog qoomman oo jeermis ka buuxsamay oo qaybtii xanuunsanaysayna ama qoommanaydna aan la daawayn karin, laakiinse ay tahay in laga takhalluso si aanu ugu dhex faafin jidhka oo dhan. Haddaba walwalku sidaas ayuu ka dhiganyahay, oo haddii aan la joojinna waxa uu ku faafayaa nolosheenna oo dhan isaga oo waxkastana kharribaya.

Khatarnimada walwalku waxa ay ka bilaabmaysaa isagoo ah dembi. Warqadda Yuudas 14-16, kuwa walwala waxa loogu horraysiin doonaa xumaanfalyaasha uu Ilaah xukumi doono. Walwalku waa dembi oo Ilaahna waxa uu xukumi doonaa kuwa walwalka badan, haddaba arrintaasi miyaanay khatar ahayn?

Walwalku waa dembi, maxaa yeelay waxa uu fallaago ku yahay Ilaah. Markii Israa'iiliyiintu ay ku sugnaayeen saxaraha ayaa ay aad u walwaleen. Iyada oo Ilaah uu iyaga ka soo samata

bixiyay addoonsigii ku haystay Masar, ayaa haddana waxa ay noqdeen kuwo aan faraxsanaannin oo muddona sidaan ayaa xaalkoodu ahaa. Markasta oo ay walwalaanna, waxa ay u walwalayeen oo ay ka cabanayeen Ilaah (Tirintii 14:26-29). Cutubka 16 aad ee kitaabka Tirintiina, waxa ay dadku u walwaleen Nabi Muuse iyo Haaruun, hase ahaatee Ilaah waxa uu middaas ka soo qaaday iyadoo isaga laga walwalayo, oo kuwii walwalayayna si adag ayuu u ciqaabay. Haddaba, walwalku waa khatar, waana in la daaweeyo inta aan ruuxda walwalku ku dhex faafin kuwa kalena.

Walwalku waxa uu si gaara khatar u yahay marka uu ka soo fulayo dadka Ilaah, waayo taasi waxa ay liddi ku tahay waxkasta oo dhacay markii iyaga noloshooda uu bedelay. Ilaah iyaga waxa uu ka dhigay kuwo garta dembigooda oo qirta, haddaba suurto gal ma tahay waxyaalaha muhiimadda yar lihi, inay ka qaadaan farxaddooda? Waxa uu iyaga u muujiyay oo u caddeeyay jacaylka Masiixa ee layaabka leh, iyo isagoo diyaar u ahaa inuu farxad kaga tago Aabbihiis iyo ammaanta boqortooyadaba, Isagoo sidoo kalena soo qaatay jidh bani-aadan oo noloshiisanu ahayd mid is hoosaysiini ka buuxdo, oo sidoo kalena Isaga oo bilaa dembi ama wax dembi ah lahayna ayuu dhintay.

Haddaba suurto gal ma tahay in waxaalayaas oo dhan la illaawo iyaga oo ka cabanaya inaanu Ilaah u samo falin? Waxa uu iyaga ka xoreeyay doonista ama rabitaanka farxadda ku jirta waxyaalaha maaddiga ah, haddaba marka ay heli waayaan, ma inay walwalaanbaa? Masiixa ayaa ah Sayidkooda iyo Boqorkoodaba, haddaba ma waxa ay ku socdaan Inay isaga hoggaamintiisa diidaan marka ay walwalayaan? Ilaah waxa uu iyaga ugu yimid si ay ugu hoggaansamaan doonistiisa, haddii markaas ay walwalaanna waxa ay taasi ka dhigantahay, iyagoon Isaga si dhaba ugu hoggaansamin, waxa kale oo taasi ay tusin kartaa in aanay gebi ahaanba ahayn kuwo rumaysad leh.

Haddaba, marka rumaystayaashu ay xasuustaan waxyaalaha Ilaah iyaga u sameeyay sida Isagoo iyaga jeclaaday, ama Isaga oo u dembi dhaafay oo u hibeeyay nolosha cusub, oo si gaar ahna ugu cusboonaysiiyay inay ku noolaadaan barakooyinkaas ilaa inta ay dunida ka tegayaan, waxa dhacaysa inaanay walwalin ama murugoon, balse waxa ay xiiso u sii qaadayaan Ciise Masiix oo ah Sayidkooda, Boqorkooda iyo Badbaadiyohooda.

Sidoo kale walwalku kuma habboona heerka uu Ilaah dhigay dadka rumaystayaasha ah. Ilaah waxa weey Aabbaha dadka rumaysadka leh,

sidaan darteedna walwalkoodu waxa uu ka dhiganyahay iyagoon ku kalsoonayn waxa uu iyaga la rabo, ama aanu middaas karaynin. Sidoo kale Masiixu waxa weeye Badbaadiyohooda, sidaan darteedna walwalkoodu waxa uu ka dhigan yahay iyaga oo ka shakisan jacaylkiisa. Ruuxu Quduuska ahina waa Gargaarohooda, oo walwalkooduna waxa uu ka dhiganyahay iyagoon rumaysnayn awooddiisa ama rabitaankiisa ah inuu iyaga u gargaaro.

Bal aynu si dheeraada ugu fiirsanno heerarka kala duwan ee Ilaah uu dadka rumaystayaasha ah dhigay. Ilaah waa uu sharfay iyaga oo waxa uu ka dhigay hoggaamiyayaasha samada iyo dhulkaba, sidoo kalena iyaga waxa uu Isaga dhowaysiiyay malaa'igaha, oo waxa uu ka dhigay kuwo Masiixa mid ku ah. Rumaystayaashu waxa ay ku suganyihiin maqaam heer sarreeya, oo waxyaalahaas oo dhammina waxa ay muujinayaan awoodda Ilaah ee ka dhex muuqata noloshooda, sidaasi darteedna Ilaah waxa uu xaq u leeyahay, in kuwa uu sidaan u sharfay aanu ka filinnin inay walwalaan.

Ilaah ma'aha badbaadiyohooda oo keliya, balse sidoo kale waxa uu yahay Aabbohood, oo aabbayaashuna waxa ay jecelyihiin in xoogganaantoodu ay ka dhex muuqato carruurtooda, sidaan oo kalena Ilaah waxa uu rabaa in Ruuxiisa Quduuska ahi uu ka dhex muuqdo carruurtiisa, oo si gaarana wuxuu u rabaa inay ka muuqato la midnimada Wiilkiisa Ciise Masiix oo intuu si adag u xanuunsaday haddana aan marnaba walwalin, balse wuu tukaday

Isagoo leh “Doonistayda yaanan ahaanin, balse ha ahaato doonistaada”. Haddaba Ilaah waxa uu xaq u leeyahay in carruurtiisa aanu ka filanin walwalitaan.

Haddii rumaystayaashu ay sheegtaan in Ilaah uu yahay mid iyaga wax kasta oo dunidan korkeeda yaalla uga qiimo badan, waxa iyaga ku waajib ah in middaas ay ku muujiyaan qaab nololeedkooda. Inaad rumayste sheegato oo haddana waxa aad sheeganayso si ka gedisan aad u dhaqanto, waxa kaaga fiican inaad gebi ahaanba sheeganin arrintaas. Ilaah waxa uu xaq u leeyahay in kuwa sheeganaya rumaysadku ay ilaaliyaan heerarka Masiixiyadda ee Ilaah uu iyaga ku kor yeelay.

Ilaah waxa uu siiyayay rumaystayaasha iimaan ay ku garan karaan inay xaq u leeyihiin gaadhitaanka ballanqaadyada Ilaah. Kitaabka Quduuska ahi waxa uu leeyahay: “Rumaystayaashu waa inay ku noolaadaan rumaysad”, oo taasna macneheedu ma’aha in la fisho nolol aan dhibaatooyin lahayn, waayo haddii kale maba jirto baahi loo qabo rumaysadka! Haddaba micnaha ku noolaanshaha rumaysadku waxa weeyi iyadoo rumaystayaashu ay doonista Ilaah ku guddoomaan farxad, maxaa yeelay waxa ay ku kalsoonyihiin inuu iyaga u ballanqaaday waxkastoo u wanaagsan. Ilaahna waxa uu xaq u leeyahay in kuwa bartay isku hallaynta ballanqaadyadiisa aanu ka filanin walwalitaan.

Si kale marka aan u nidhaahnana, Ilaah waxa uu dadka rumaysadka leh ka rabaa inay sabraan wakhtiyada jarribaaddu jirto, oo ay sidoo kalena farxaan xilliyada lagu jiro cidhiidhiga. Kuwo badan ayaa nimcadiisa aawadiis ku gaadhay heerkar sarreeya, oo kuwa iyaga ka midana waxa aan ka akhrin karnaa Cibraaniyada 11. Waxa weeyi dad caadi ah oo Ilaah talo saartay ama isku halleeyay wakhtiyada cidhiidhiga si uu iyaga u taageero una xoojiyo.

Haddaba Ilaah sidaas ayuu filayaa, oo kuwo kalena waa ay sameeyeen middan, sidaas darteedna inaguna waan awoodi karnaa oo waan samayn karnaa.

Walwalku waxa uu baryadeenna ka dhigayaa mid bilaa macno ah, oo ma’aha inaynu nidhaahno: “doonistaada ha ahaato” inaga oo filayna ahaanshiyaha doonisteenna! Sidoo kalena ma’aha inaynu nidhaahno: “nasii kibis manta nagu filan”, kaddibna aan filano beri oo badhaadhe badani ahaado.

Haddaba tukashadeenna ayaa waxa ay koobsanaysaa in waxkasta oo aan haysannaa uu ka ahaaday Ilaah agtiisa, haddii markaas wixii Ilaah uu ina siiyay aan ku bilawno walwal, waxa xigta inaga oon garanayn inaan ka istaagno tukashadii.

Walwalku waxa uu keenaa ama soo jiidaa murugada, sidoo kalena waxa weeyi wakhti lumis, waayo waxa mashquulaya fikirkeenna oo dhan, ilaa marka danbana aan ka gaadhayno heer aynu ku joojino ka fikiritaanka Ilaah iyo Ereygiisa. Waxa uu inaga dhigayaa kuwo aan waxtar u lahayn u adeegitaanka Ilaah. Qofka faraxsani waxa uu u raaxayn karaa oo u qalbi qaboojin karaa dadka kale marka ay u baahanyihiin, laakiinse kan walwalayaa ma hayo wax uu bixiyo. Haddaba walwalitaanku waxa weeyi tallaabada u horreysa ee lagaga fogaado Ilaah, oo wixii uu sameeyay Yoonis waxay ahayd isku dayitaan ah doonista Ilaah oo halkii looga hoggaansami lahaa la isku dayo in la niyad jebiyo. Waxa intaasoo dhana ka daran iyadoo walwalku uu inaga dhigayo kuwo diida oo dafira kheeraadka. Kitaabka Quduuska ahina dafirista kheeraadka waxa uu ku tirinayaa inay tahay dembi. Rumaystayaasha walwalaa waxa weeyi kuwo aan ka mahad celinin waxyaalaha badan ee Ilaah uu iyaga siiyay, oo waxa ay dalbadaan haddii wax ka badan la siin lahaa inay Ilaah ammaani lahaayeen, laakiinse runtu waxa ay tahay in waxa ay haystaanba aanay Ilaah ugu mahad naqaynin. Haddaba waxa suurto gal ah in rumaystayaashu ay dafiraan oo diidaan waxyaalaha iyaga Ilaah siiyay, ha ahaadaan hadiyadihiisa ruuxiga ah amaba barakooyinkiisaba ee. Hase ahaatee Ilaah waxa uu rumaystayaasha ka sugayaa inay noqdaan kuwo uga mahad celiya wax kasta oo iyaga uu siiyay. Luther ayaa waxa uu yidhi: “Qaabka Ruuxa Ilaah u shaqeeyaa waxa weeyi inuu

innaga yareeyo ka fikiritaanka dhibaatooyinka, iyo inaan aad uga fikirno waxyaalaha wanaagsan, haddii markaas Ilaah inoo ogolaado iskutallaab, taasi waxba ma'aha, oo marka uu inoo samo falo ayaa ka wayn”.

Haddii rumaystayaasha ay la soo deristo jarribaadi, waa inay Ilaah uga mahad naqaan iyadoo sidii laga filayay aan u xumaannin. Haddaba Ruuxa Quduuska ahi waxa uu rumaystayaasha baraa inay weyneeyaan barakooyinka Ilaah ee ay haystaan, iyo inay yareeyaan dhibaatooyinkooda, laakiinse Shaydaanku waxa uu adeegsadaa qaab middaas ka soo horjeeda. Bal u firso markii Israa'iliyiintu ay joojeen cidlada ee ay Nabi Muuse ku yidhaahdeen:

*“Ma wax yar baa inaad naga soo kaxaysay dal caano iyo malab la barwaaqaysan, si aad noogu dishid cidlada dhexdeeda, oo aad weliba annaga amiir isaga kaayo dhigtid?”* (Tirintii 16:13).

Qalbiyadooda waxa uu buuxiyay walwal gaadhsiiyay heer ay runta ku dafiraan, maxaa yeelay Masar oo ahayd dhulkii lagu addoonsanayay ee lagu garaacayay carruurtana lagu laynayay, may ahayn dhul laga helayo malab iyo caano. Hoggaamintii Muuse waxa ay noqotay mid kalsoonida lagala noqdo, sidoo kalena waxa la xumeeyay xaqiiqada ujeedooyinkiisa.

Haddaba rumaystayaashu sidaas ayay samayn karaan marka dhibaatooyinku yimaaddaan, oo waxa lagu jirrabaa inay ahaayeen kuwo farxad badan haystay rumaysadka hortii, sidaas darteedna malahan ayaa waxa uu ka dhigaa kuwo dareemaya murugo.

Walwalku ma'aha dembi oo keliya laakiinse sidoo kale waa nacasnimo, waayo waxa keliya ee aynu ka goosanayno walwalku waa murugo, haddaba maxay tahay faa'idada ku jirta inaan u walwalno waxaynaan haysanin? Taasi miyay inoo sahlaysaa inaan ku raaxaysano waxa aynu haysano? Ilmaha yari miyuu ku gaajo beelayaa diiditaanka kibista haddii aan la haynin keeg? Haddaba, walwalka wax faa'iido ahi kuma jirto gebi ahaanba. Sayid Ciise Masiix ayaa wax uu leeyahay:-

*“Midkiinnee intuu welwelo dhererkiisa dhudhun ku dari kara?”* (Matayos 6:27).

Jawaabta kelida ahi waxa weeyi “qofna!” waxa dhici karta in dadku ay isku mashquuliyaan fikir dhimasho ah, laakiinse marnaba walwalku ma'aha mid wax faa'ido ah u keenaya. Oo waxa dhici kartana in iyaga Ilaah uu ka mamnuuco barako gaara isagoo ugu dib dhigaya ilaa inta ay ka noqonayaan kuwo qalbigoodu saafi u yahay guddoonka barakadaas, waayo haddii uu iyaga barakadaas ku dhex siiyo iyagoo walwalaya, waxa dhici karta inay qiimayn kari waayaan samo falkuu iyaga Ilaah u sameeyay. Runtu haddaba wax ay tahay inuu walwalku yahay nacasnimo, waayo arrimaha waa uu sii xumaynayaa oo keliya, oo rumaystayaasha walwalaana waxa weeyi kuwo kibirsan oo diidaya waxyaalaha uu Ilaah iyaga la rabo. Waxa ay ka dhiganyihiin bad-maaxyada ka walwalaya soo dhicitaanka dabaysha, halkii ay doontooda uga diyaar garayn lahaayeen waajihitaanka mowjadaha dabaysha wata. Laakiinse bad-maaxyada maskaxda lihi waxay waajahaan dabaysha iyagoo dejinaya shiraacyada.

Labada waxyaalood ee kale ee aan ka xusi karno walwalka ayaa ah kuwo aad u khatar badan. Walwalku waxa uu kiciyaa cadhada Ilaah, oo Ilaah waa kii u cadhooday Israa'iiliyiinta markii ay walwaleen, taasina waxay ka dhigantahay in Ilaah uu cadhoodo marka ay rumaystayaashu walwalaan. Israa'iliyiinta waxa lagu ciqaabay walwalkooda aawadiis, sidaas darteedna rumaystayaashu waa inay taxadiraan, si dhibaatooyinkooda kale aanay ugu darmin waxyaabo ku keeni kara ciqaabka Ilaah. Ruuxda walwalka iyo murugadu waxa weeyi ruuxda Shaydaanka, waayo Shaydaanku waxa weeyi kii ugu horreeyay ee walwala isla markaasna ka soo horjeesta Ilaah, sidoo kalena waa kii ugu horreeyay ee Ilaah nacdalo. Haddaba waxkastoo

Ilaah ka soo horjeedaa waxa uu keenaa lacnad, oo rumaystayaashuna waa inay ka digtoonaadaan waxa uu Kitaabka Quduuska ahi ka leeyahay walwalka.

Waxa kale oo intaas dheer iyadoo Ilaah kuwa Isaga u walwala uu ka xaaraantimeeyo ilaalintiisa iyo daryeelkiisa. Shaqaalaha cadho gelinta sameeyaa waxa uu khatar ugu jiraa in laga kaaftoomo, oo uu raadsado shaqo kale, sidoo kalena Ilaah waxa uu ka kaaftoomi karaa dadkiisa si ay u raadsadaan sayid kale marka ay ka walwalaan qaabka uu iyaga uula dhaqmayo. Taasina waxa ay ku imanaysaa Isaga oo raba inuu iyaga edbiyo si ay u noqdaan kuwo Isaga ku kalsoon, amaba waxa dhici karta in gebi ahaanba aanay ahayn rumaystayaal dhab ah.

Haddaba, walwalku waxa uu leeyahay dhibaato waayo waxa weeyi tallaabada u horraysa ee siibashada iyo dhicitaanka. Israa'iliyiintii ka walwalay cidlada dhexdeedu, waxa ay noqdeen kuwo aan arkin Dhulkii Ballanqaadka.

## CUTUBKA TODDOBAAD

Iska Jooji Walwalitaanka:-

Walwalitaanku mar kastaba waa dembi sidoo kalena waa nacasnimo, laakiinse waxa jirta mararka qaarkood oo uu khatar aad khatar u yahay. Cutubkan dhexdiisana waxa aan ku baran doonnaa afar arrimood oo ku saabsan arrintan.

Ugu horrayn: walwalku waxa weeyi khatar xaqiiqi ah, gaar ahaan marka aan helno barakooyin badan. Tusaale ahaan haddii dhibaatooyin ay ka dhex bilaabmaan kaniisadda, waxa la inagu jarriiba inaan walwalno oo aan illoowno inaan ka mahad celino xorriyadda aan u haysano caabuditaanka Ilaah, waayo waxa jira meelo kale oo dadka rumaysadka lihi ay ku silcayaan isla markaasna lagu laynayo ama lagu xidhayo Masiixa oo ay raaceen aawadiis. Sidoo kale haddii Ilaah uu barakadeeyo kaniisad kale waxa la inagu jirraaba hinaase iyo walwalitaan, oo markaasna waxaan illoownaa inaan Ilaah u mahad celino, maxaa yeelay sida uu iyagaba u barakadeeyay ayuu inagana inoo barakadeeyay habo ahaadaan siyaabo kala duwane. Marka Ilaah kaniisaddeena u samo falo wakhti aan marayno dhibaatooyin gaar ah, waxa la inagu jirraaba inaan Ilaah uga mahad celino samo falkuu u sameeyay kaniisadda, inaga oo taa beddelkeeda ka walwalna dhibaatooyinkeenna gaarka ah. Haddaba waxa la inaga rabaa inaan marwalba awood u yeelano ku farxitaanka markuu Ilaah kaniisaddiisa u samo falo.

Marka labaad: walwalku waxa uu aad khatar u noqonayaa marka aan u walwalayno arrimo aan waxba ahayn. Waxa doqonnimo ah in hooyo ay ilmeheeda caafimaadka qaba ka walwasho jimidhkiisa oo yar. Boqor Aakhaab oo u talinayay boqortooyo dhan ayaa ka murugooday isagoon haysanin wanaag gaar ah. Haddaba waxa doqonimo ah in rumaystayaashu ay u walwalaan waxaan waxba ahayn.

Marka saddexaad: walwalku waxa uu khatar yahay marka uu ka soo fulo kuwa Ilaah uu u samo falay. Haddii qof musaafir ah oo qariib ama socoto ah hadba sidaad u taqaanno la marti qaado, oo uu faraha ku fiiqo waxyaalo aan cajabenin ama aanu ka helin, taasi waxa ay tahay doqonimo iyo diidmo xun. Rumaystayaashu haddii waxkasta oo ay haystaan ay Ilaah kaga heleen bilaash miyaanay dunidan guudkeeda ku ahayn qariib? Haddii Ilaah iyaga uu sidaas ugu wanaagsan yahay ma'aha inay walwalaan.

Marka afraad: walwalku waxa weeyi khatar, haddii dhibaatooyinka inasoo gaadhayaa ay ka qaybihiin qorshayaasha Ilaah. Kitaabka Quduuska ahi waxa uu leeyahay: “Enoog waxa uu

la socday Ilaah”, taasina waxay ka dhigantahay in markuu arkay Ilaah oo noloshiisa ka dhex shaqaynaya uu raacay una hoggaansamay. Rumaystayaashu waxay weeyi kuwo diyaar u ah waxa Ilaah uu la rabo iyaga xitaa wakhtiga cidhiidhiga lagu jiro. Waxa ay ku kalsoonyihiin inuu middaas u samaynayo si uu iyaga ugu tabo-baro is hoosaysiinta isagoo ku korinaya noloshooda ruuxiga ah.

Waxaa haddaba khalad ah oo aan loo baahnayn inaan walwalno, maxaa yeelay Ilaah marwalba waxa uu sameeyaa waxa inoo khayrka badan innaga, sidoo kalena waxa si gaara u khalad ah inaan ku sii socono walwalkeenna, maxaa yeelay Ilaah marwalba wuu inoo samo falayaa. Aqbalitaanka/guddoonka edbintu ma’aha arrin sahlan, laakiinse Ereyga Ilaahay wuxuu ina leeyahay sidatan: *“laakiin dabadeedo waxay kuwii lagu edbiyey u dhashaa midho nabad iyo xaqnimo ah.”* (Cibraaniyada 12:11).

Haddaba markasta oo rumaystayaasha ay tijaabiyaan gacanta Ilaah ee iyaga dulsaaran, waxa ku waajib ah inay qadariyaan sida uu iyaga Ilaah u daryeelo.

Marka aan is aragno inaga oo ka mid ah kuwa arrimahan walwalidda ku dhex jira, waxaa iminka la joogaa wakhtigii aan ka joogsan lahayn ama aan ka tanaasuli lahayn dareenka walwalka. Hase ahaatee markale bal aan u fiirsano xaaladda saddexaad iyo midda afaraad, si aan u aragno in Ilaah markastaba uu si wayn uu ugu samo falo rumaystayaasha. Iyagu marwalba waxaa ay ku suganyihiin xaalad uu Ilaah ku samaynayo waxa iyaga u khayr badan ama u roon, sidaas daraadeedna walwalku/kurbada waxa weeye khatar haddii uu iyaga ka yimaaddo. Haddaba waxa loo baahanyahay in la ogaadaa iyadoo wakhtiga la iska joojinayo walwalku aanu ahayn mid xadaysan balse uu yahay mid eegga loo baahanyahay.

## CUTUBKA SIDEEDAAD

### Ma Lihid Cudurdaar:-

Ilaa markii Aadan iyo Xaawa uu Ilaah wax ka waydiiyay dembigii ugu horreeyay, waxa jirta in dadku rag iyo dumarba ay cudurdaar u sameeyaan qaab dhaqankooda, halkanna waxaan ku arki doonnaa kuwo ka mida cudurdaarradaas.

“Anigu ma Walwalo, laakiin waxaan muujinayaa xaqiiqada”. Shaki kuma jiro in rumaystayaasha laga rabo inay arrimohooda si xaqiiqo ah u eegaan, laakiinse ma’aha inay walwalaan ee waa inay taas beddelkeeda sameeyaan, waayo haddii ay ku baraarugsanyihiin xaqiiqooyinka, taasi waxay ka dhigantahay inay barakooyinka Ilaahna ku baraarugsan yihiin. Haddii markaas ay yihiin kuwo ku fikiraya dhibaatooyinkooda oo keliya halkii ay Ilaah kaga fikiri lahaayeen, markaas waxa ay samaynayaan muuqaal qarabaya ama waxyeellaynaya xaqiiqada. Haddaba xaqiiqooyinka oo lagu baraarugaa ma’aha waxa rumaystayaasha ka hor istaagaya inay Ilaah u adeegaan, laakiinse iyadoo xaqiiqooyinka aawadood loo walwalo ayaa ah mid ka hor istaagaysa u adeegitaanka Ilaah. Haddaba aynu wajahno xaqiiqooyinka iyadoo taasi inoo hoggaaminaysa inaan Ilaah u mahad celino, innagoon ugu mahad naqayn wuxuu inoo sameeyay oo keliya, balse ugu mahad naqayna wuxuu dadka kalena u sameeyay. Haddii markaas aynu nahay kuwo xaasidaya dadka kale, taasi waxa ay ka dhigantahay inaan dhibaatooyinkeenna uga fikirayno si ka badan sidii laga rabay, innaga oo markaasna aan sidii la rabay uga fikiraynin Ilaah!

“Anigu ma walwalayo, laakiin waxaan dareemayaa dembigayga”. Waxa sahlan inaad sidaas tidhaahdo, laakiin marka uu cidhiidhi kaa baxo waxa hore ka qarsoomaya dareenkii laga sheeganayay dembiga, taasina waxya muujinaysaa iyadoon gebi ahaanba aanu jirin dembi laga murugoonayay. Rumaystayaasha sida dhabta ah dembiga uga xanuunsadaa, ma’aha

kuwo doonaya walwalkooda aawadiis inay ku sii korodhsada dembi kale, laakiinse ugu horrayntaba waxay ku faraxsanyihiin inuu Ilaah edbiyo iyaga.

“Anigu ma faraxsani, maxaa yeelay ma dareemayo inuu Ilaah ila jiro”. Haddaba dhibaataadu markay inasoo gaadho een silicno taas macneheedu kama dhigna inuu Ilaah inaga tegay. Aabbuhu marka uu edbinayo wiilkiisa taasi kama dhigna inuu ka soo horjeestay oo isaga cadow ku ah. Ilaah waxa uu ballan qaaday inuu la jiro dadkiisa, gaar ahaanna wakhtiyada cidhiidhiga:

*“Markaad biyaha dhex maraysaan waan idinla jiri doonaa, oo markaad webiyaasha dhex qaadaysaanna idinma qarqin doonaan”* (Ishacyaah 43:2). Haddaba Ilaah wuu joogaa, laakiin waxay u muuqataa in kuwo ka mida rumaystayasha aanay arrintaas dareemaynin, maxaa yeelay ruuxda walwalka ayaa ka fogeeyay dareemista joogitaanka Ilaah. Haddii markaas ay rabaan inay Isaga xaadirnimadiisa dareemaan, waxa ku waajib ah inay is dejiyaan, oo ay u hoggaansamaan isla markaasna ku dadaalaan inay ahaadaan sida Ilaah la doonayo inay noqdaan.

“Xanuunku ma’aha waxaan kari karin laakiin waa heerka ay ka taagan yihiin dadka kale”. Haddaba xitaa heerka ama mawqifka kuwa kale waxa uu yahay mid ku jira gacanta Ilaah, sidoo kalena Ilaah waxa uu awoodaa kuwa sharka badan inuu u adeegsado xaqiijinta ujeedooyinkiisa, sidaas darteedna rumaystayaasha waa inaanay illaawin iyadoo xumaanfalayaashu ay hoos joogaan xukunka Ilaah, waxaana laga raba inay iyaga u duceeyaan. Si kastoo mucaamalada kuwa kale ay u adkaato, rumaystayaashu waa inay marwalba maskaxda ku hayaan in Ilaah uu la jiro carruurtiisa. Waa inay Isaga mahadiyaan, oo cudurdaarna uma haystaan inay walwalaan.

“Gebi ahaanba middaas maan filanaynin...” rumaystayaashu waa inay fishaan dhibaatooyinka noloshan dhexdeeda, waana inay diyaar u ahaadaan wakhtiyada cidhiidhiga, si ay u awoodaan ka hortaggiisa marka ay soo foodsarto xaalad adag. Laakiin intee in le’eg baad u malaynaysaa inay odhan karaan “ ma aan filanaynin middaas” marka uu Ilaah wanaaggiisa ku manaysto iyaga?

“Dhibaataadaydu way ka xuntahay dhibaatooyinka kuwa kale”. Sidee ayaa middaa ku garatay? Waxa laga yaabaa in walwalkaagu uu kuu hoggaamiyay ku talaxtegitaan. Laakiin haddii hadalkaagu saxsan yahay, taasi waxay ka dhigantahay in Ilaah uu ku siiyay jaanis ka wayn midka uu siiyay dadka kale si aad Isaga u ammaantid. Marka ay iyagu arkaan sida aad dhibaatooyinkaaga uga adkaanaysana waxa ay ammaani doonaan Ilaah, oo waxaana laga yaabaa in iyaguna ay ku dhiirraadaan inay ka adkaadaan dhibaatooyinkooda yaryar ee haysta.

“Dhibaataada i haysataa waxay ii diidaysaa inaan Ilaah u adeego”. Mararka qaar duruufaha aawadood, waxa dhacda in rumaystayaasha aanay awoodi karin inay Ilaah ugu adeegaan sidii ay rabeen. Haddaba iyadoo la doono u adeegitaanka Ilaah waa arrin wanaagsan, dabiici ahaanna waxaanu shaki ku jirin inaan murugoonno marka aan kari wayno arrintaas, hase ahaatee taasi cudurdaar uma aha walwalka. Waxaynu nahay xubno ka mida jidhka Masiixa, inaan ahaanno xubin ka mida jidhka Masiixa oo aan muhiim ahaynina waxay ka fiicantahay inaan ahaanno shakhsi muhiima oo aan ka mid ahayn jidhka Masiixa. Dhammaan rumaystayaasha waxaa loogu yeedhay muhiimad ruuxi ahaaneed sida ay doonaanba ha u arkaan muhiimaddooda ee, maxaa yeelay waxyaalaha yaryar ee ka ahaaday rumayste hooseeya, waxay Ilaah uga farxad badanyihiin dhammaanba waxyaalaha muhiimka ku ah taariikhda, waayo Ilaah ma doonayo in caan la noqdo ama la fuliyo waxyaalo muhiim ah, laakiinse wuxuu raba aaminaadda iyo samirka. Haddaba kuwa sita sifooyinka ruuxiga ah ee caynkan ah, waxa lagu abaal marin doonaa jannada. Marka hadda ay rumaystayaashu gartaan arrintaas, waxay ogaanayaan inaanay jirin sabab loo walwalaan.



“Duruufta i haysata ma xammilli karo waayo waa mid is bedbedelaya”. Duruufheenna is bedbedelayaa waxay inooga faa’idaynaysaa inaan barano sidii tallaabo kastoo aan qaadaynaba aan isugu hallayn lahayn Ilaah. Markastabana ruuxeenu wuxuu ahaanayaa mid sugan, sidoo kalena khayrkeenna weligiis ahi waxaa weeyi mid la dammaanad qaaday, oo Masiixuna wuxuu ina siinayaa barakooyin badan “Dhammaanteen waxaynu buuxnaantiisa ka helnay nimco ka nimco.” (Yooxanaa 1:16).

“Waxaan ahaa taajir haddana sabool ayaan noqday”. Taasi cudurdaar uma aha walwalka, miyaanad awoodi karin inaad ahaato mid mahad naqa, maxaa yeelay maalin maalmaha ka mida waxaad ahayd hantiile, waxaanad fursad/jaanis u haysatay inaad u diyaar garowdo maalintan faqiirnimada? Ama waxaad ahayd xor oo waxaad haystay fursad/jaanis aad ugu diyaar garowdo wakhtiga gumaysiga? Bad-maaxa xikmadda lihi wuxuu ka faa’idaysta maalmaha baddu ay degantahay, si uu doontiisa ugu diyaar gareeyo waajihitaanka dabaysha. Ilaah dushiisa may ahaanin inuu rumaystayaasha waxwalba siiyo, sidaas daraadeed waa inay ahaadaan kuwo ku mahad naqa barako kasta oo hore ay u heleen haddana ay helayaan iyagoon weliba mutaysanin.

Miyay fiicantahay inaan u walwalno dhibaatooyin yaryar oo inagaga imanaya socdaal loogu jiro dhinac kale oo lagu nolosha waligeed ahaan doono? Waxa laga yaabaa in cudurdaarkeenna loo fasiro sidan: “hantida helitaankeeda waxaan u soo maray dhibaatooyin adag, oo caddaaladna ma’aha inaan waayo”.

Laakiin inta aanay rumaystayaashu wax necbaysanin, waxa waajib ah inay hubiyaan haddii ay mutaysteen inay waxaas cidhiidhi ka dareemaan, kadibna waa inay u diyaar garoobaan sidii ay uga joogsan lahaayeen walwalka, iyadoonay u fiicantahay inay arrintaas ku beddelaan wax kale oo Ilaah lagu ammaano. Su’aalaha Cutubyada Lixaad, Toddobaad iyo Siddeedaad hoos ka eeg.

Waxaad akhridaa Filiboy 2:14, 15 -----:-

- Ma rumaysantahay in walwalku dembi yahay?

Waxaad akhritadaa Ishacyaah 53:3-7, Sayidkeenna Ciise Masiix muu gunuunicin iyadoo gardarro lagu sameeyay oo iskutallaabta lagu qodbay.

- Sidee ayaa haddaba qaab dhaqanka Masiixu uu saamayn uu ugu yeelan karaa qaab dhaqanka rumaystaha?

Waxaad akhridaa Filiboy 4:6, 7 adigoo barbar dhigaya 1 Tesaloniika 5:16-18.

- Waa maxay xidhiidhka ka dhexeeya tukashada iyo qancitaanka Masiixiyaddu?

Israa’iliyiintu si joogto ah ayay Ilaah ugu Walwalayeen isagoo ka soo samata bixiyay dhulkii Masar, taasina waxay cadho gelisay Rabbiga Isagoo u cadhooday kaddibna ciqaabay iyaga. Haddaba miyaad rumaysantahay inuu Ilaah inoo cadhoonayo marka aan waxyaalaha qaarkood Isaga uugu walwalno? Sidoo kale suurto gal ma tahay in dhibaatooyinkeenna kuwo ka mid ah sababtoodu ay tahay ciqaab ka ahaatay xagga Ilaah oo ku timid walwalitaankeenna aawadiis?

Waxaad akhridaa Cibraaniyada 12:7-11.

- Sidee ayaa cidhiidhiga iyo dhibaatooyinku u noqon karaan qayb ka mida wanaagga oo la inagu laylinayo/tababarayo?
- Sidoo kale muxuu yahay mawqifka saxda ah ee laga istaagi karo tabo barkan ama laylitan si loo dammaanad qaado guusheenna?

- Sidee ayaad walwalkaaga uugu raadisaa cudurdaar?

Casharradan dhexdooda maxaad kaga baratay naftaada?

## CUTUBKA SAGAALAAD

### Jidka Farxada:-

Farxada ama ku qanacsanaanta Masiixiyaddu waxa weeye midda burinaysa ruuxda walwalka. Waxa ay ka bilaabantaa gudaha qalbiyada rumaystayaasha. Doonnida biyaha dul socotaa dheelli tirkeeda kuma haysan karto tiirar dibadda ka ahaaday, laakiinse waxa weeyi tiirar iyada gudeheeda ku yaalla.

Haddaba sidaas oo kale ayaanu u jirin wax dibadda ka yimaadda oo qofka rumaysadka leh siinaya ama u dammaanad qaadaya farxad waaraysa, laakiinse waxa loo baahanyahay waa nimco ka ahaatay gudaha. Haddii markaas rumaystayaashu ay haystaan nimcadaas guduhooda ka ahaatay, waxa u suuroobaysa inay raacaan kuwo ka mida tallaabooyinka ka caawin kara inay helaan farxad run ah.

Ugu horrayn: waa inay ka digtoonaadaan isku mashquulinta arrimaha dunida. Middan loogalama jeedo inay ka dheeraadaan gebi ahaanba dunida, balse waxa dhici karta in iyaga Ilaah uu u dhiibo shaqooyin muhiim ah oo dunidan dhexdeeda ah. Laakiin haddii rumaystayaashu ay rabaan inay helaan farxad run ah, waxa laga rabaa inaanay dhaafin xadka ugu hooseeya ee ku mashquulitaanka arrimaha dunida.

Marka labaad: Waa inay addeecaan Erayga Eeebbe ee lagu muujiyay Kitaabka Quduuska ah dhexdiisa. Taasina ma'aha arrin culus, maxaa yeelay Kitaabka Quduuska ahi wuxuu sheegayaa in Ilaah waxkastaba uu ka dhigo mid u khayr badan rumaystayaasha (Rooma 8:28), sidaas darteedna marka ay Ilaah u adeegayaan, waxay u adeegayaan Sayid qalbigiisa geliyay inuu uugu deeqayo waxa iyaga u wanaagsan. Marka rumaystayaashu ay arrintaas fahmaanna, waxa u suurto galaysa inay doonista Ilaah farxad uugu hoggaansamaan.

Marka saddexaad: Iyagoo ku soconaya tusaalaha halyeyada iimaanka ee ku sugan Cibraaniyada 11, waa inay ku noolaadaan rumaysad si ay u fahmaan una qaataan duruuftooda, sidoo kalena waa inaanu rumaysadkoodu ahaanin mid ku kooban ballanqaadyada Ilaah oo keliya, laakiinse waa inuu ku koobnaado Ilaah laftiisa, maxaa yeelay Isagaa daryelaya oo gaadhsiinaya heer ay kaga kaaftoomi karaan walwalka. Suqraadis oo ahaa faylosuufar (469-399 C.H), ayaa waxa uu yidhi: "Haddii Ilaah uu sidan idiinku fikirayo, maxaad wax kale ugu fikiraysaan?" Wakhtiyada cidhiidhiga, waxa waajib ku ah in culayskooda ay dusha ka saaraan Ilaah oo ay jidadkooda ay Isaga gacanta u geliyaan.

Marka ay sidaas yeelaan kalsoonidaas ay Ilaah gashadeeni waxay u keeni doontaa nabad iyo farxad.

Marka afaraad: Waa inay dadaalaan si ay u helaan maan ruuxi ah si ay u

Doondoonaan waxaana qoran sidatan:

*"doondoona waxyaalaha korka yaal, meesha uu Masiixu joogo, isagoo fadhiya midigta Ilaah"* (Kolosay 3:1).

Haddii uu yaraado wakhtigu ay rumaystayaasha ka fikirayaan Ilaah oo uu kordho wakhtiga ay ka fikirayaan doonistooda gaarka ahi, waxa ay nafhooda u keenayaan murugo. Haddii,

laakiinse ay ku fikirnaan arrimaha boqortooyada Ilaah oo wakhti ay la qaataan Ilaah, waxa hubaala inaanay murugoon doonin marka ay arrimaha dhibaatooyinka adduunku soo food saaraan, taasina waxa ay si aada uga caawinaysaa wax walba oo soo wajahay inay uga gudbaan rumaysadka Ilaah.

Marka shanaad: Rumaystayaashu waa inaanay filanin ka dhergitaanka arrimaha adduunyada, oo Rasuul Bawlos waxa uu qoray:

*“laakiinse haddaynu haysanno dhar iyo dhuuni, way inagu filnaan doonaan.”* (1 Timoteyos 6:8).

Kuwa u hanqal taagaya waxyaabo badan, waxa badanaa ku dhaca niyad jab, sidaas darteedna rumaystayaasha waxa laga rabaa inay ku qancaan waxa ay haystaan. Waa inay raacaan waanadii iyo fariintii loo keenay Baaruug:

*“Ma nafsaddaadaad waxyaalo waaweyn u doondoonaaysaa? Ha doondooin,”* (Yeremyaah 45:5). Laakiinse haddii rumaystayaashu ay fishaan arrimo ruuxiya oo waawayn, kuma dhici doono niyad jabku.

Marka lixaad: Waa inay ka dhintaan dunida. Rasuul Bawlos wuxuu yidhi: *“inaan maalin walba dhinto”* (1 Korintos 15:31).

Rumaytayaashu waxya aaminsanyihiin in meesha keliya ee farxaddu ay ka imanaysaa ay tahay arrimaha Ruuxiga ah. Haddaba waxa jira nooc ka mid ah dhimashada oo ku saabsan arrimaha dunida, oo mugdiga dhimashadanina waxa uu ku kordhayaa nuurka ammaanta Ilaah iyo nimcadiisa.

Marka toddobaad: Waa inaanay qodqodin dhibaatooyinkooda. Ilmaha yar ee qolofka ka qaada nabarka ama finka jidhkiisa ku yaallaa waxa uu xannibaya inuu nabarku bogsado. Sidaas oo kale ayaa rumaystayasha waxay ku samayn karaan dhibaatooyinkooda, oo waxa dhacaysa inay marwalba ka hadlaan dhibaatooyinkaas ilaa ay ka gaadhsiiyay heer ay ku illoobaan salaaddooda, oo taasina waxa ay sii xumaynaysaa dareenkooda, waayo dhibaatooyinkooda waxay uula muuqanaysaa mid ka wayn sida ay tahay. Haddaba maxaa ka qurux badan inaan ka fikirno wanaagga Ilaah inoo sameeyay! Marka aan sidaas yeelno inaguma imanayo wakhti aan ku walwalno ama ku dareenno cidhiidhi. Markii ay dhimatay naagtii Yacquub iyadoo dhalaysa, waxa ay ku dardaarantay in ilmeheeda loo bixiyo “Bin Awni”, oo macnihiisu yahay “ina murugadayda”. Yacquub muu rabin inuu wiilkani xasuusiyo murugadiisa badan, sidaas darteedna wuxuu u bixiyay “Benyaamiin” oo macnihiisu yahay “ina midigtayda”. Dhinacan wanaagsani haddaba waxa uu rumaystayaasha ka caawinayaa inay helaan farxadda runta ah.

Marka sideedaad: Iyadoo daba socota waxyaalihii hore aan ku soo aragnay, waa inay ku dadaalaan inay Ilaah dhinaca wanaagsan uga fikiraan.

Saaxiibka marwalba tuhmaya saaxiibkiisa kale ee sida qaldan u fahmayaa waxba ma ogsoona. Sidaas oo kalena rumaystayaashu waxay qalad ka galaan Ilaah iyagoo si qaldan u fahma sidii iyaga uula macaamiloonayo.

Waa inay dhinaca wanaagsan uga fikiraan shuqullada Ilaah, tusaale ahaanna waxay odhan karaan: “Ilaahbaa aniga ii ah aragti oo waxa laga yaabaa in waxani khatar igu ahaa, sidaas darteedna naxariistiisa ayuu igaga fogeeyay”, ama wuxuu odhan karaa “Ilaah wuxuu arkay in ku sii jiritaanka taajirnimadu uu igu keeni karo khatar ah inaan ku dhaco dembi, sidaas darteedna naxariistiisa ayuu igaga dhigay sabool”, ama “Ilaah wuxuu ii diyaarinayaa muhiimad gaar ah, oo aniguna waan ku faraxsanahay middaas”. Jacaylku kuma farxo

dembiga, Ereyga Ilaahna waxaa ku qoran sidatan: “*xaqdarrada kuma faraxo, laakinn wuxuu ku faraxaa runta*” (1 Korintos 13:6), oo haddii aad ruux jeclaatana waxyaalaha uu samaynayo si fudud ayaad u fasiraysaa, haddii markaas ay jiraan sagaal fasiraadood oo xun isla markaasna ku saabsan sida uu Ilaah kuula dhaqmay iyo mid keliya oo wanaagsan, waa inaad qaadata middaas keliya oo sagaalka kalena aad iska illowdo.

Marka sagaalaad: Waa inaanay in badan muhiimad siinnin aragtiyaha dadka kale. Tusaale ahaan waxa iman kara qofka dadka muminiinta ah ka dhici kara farxadda ay haystaan, waana markuu iyaga uga warramo inay wax ka dhiman yihiin.

Haddaba haddii markii horeba intaanay warkan maqlin ay ahaayeen kuwo faraxsan, maxay fikirradooda ugu ogolaanayaan in kuwa aan rumaysadka lahayni dhooqeeyaan? Haddaba farxadda Masiixiyadda ee runta ahi waxa weeye midaan ku tiirsanayn waxyaalaha ay sheegayaan dadka kale.

### **Haddaba side dadka rumaysadka lihi ay ku heli karaan farxadda?**

Waxyaalihii aan soo sheegnay oo dhan waxa aan ku soo koobi karnaa sidan: Rumaystayaashu waa inaanay maxaabiis u noqonin dhaldhalaalka dunida, marka ay sidaas falaanna ma murugoon doonaan haddii ay waayaan hantiyaha, qoysaska, magaca iyo waxyaalaha la hal maalaba.

## **CUTUBKA TOBNAAD**

### **Sugnaanshaha Farxadda:-**

Sidee ayaa rumaystayaashu u dhowran karaan farxaddooda marka ay yimaadaan wakhtiyada cidhiidhiga ahi? Cutubkan uugu dambeeya waxaan kaga hadli doonnaa shan fikradood/qodob oo rumaystayaasha ka caawin karta inay ilaashadaan farxaddooda wakhtiyada cidhiidhiga ay la soo gudboonaadaan.

Ugu horrayn: Marka rumaystayaashu ay ku jiraan cidhiidhi, waa inay xasuusnaadaan waynaanta waxyaalaha uu Ilaah siiyay iyaga, oo aanay danaynin waxyaalaha ka maqan, maxaa yeelay waxa ay jarribaad ku galayaan doonitaanka waxyaalaha badan ee ay haystaan kuwa aan rumaysadka lahayni, oo taasina waxa ay ka qaadi kartaa dareenkooda ah ku qanacsanaanta inkasta oo ay hasytaan waxyaalo ruuxi ah oo kuwa aan rumaysadka lahayni aanay garanaynin. Iyaga Ilaah wuxuu siiyay “*Wuxuu Masiix inagu siiyey barako kasta oo Ruuxa ka timid ee ku jirta meelaha jannada,*” (Efesos 1:3).

Sidaas darteedna waxaa khalad ah inay murugo geliso waxyaabo adduunyo ah oonay haysanin.

Marka labaad: Marka rumaystayaashu ay ku jiraan cidhiidhi, waa inay xasuusnaadaan barakooyinkii hore ay u heleen, tusaale ahaan qofka da’diisu tahay konton jir ee labo sano xanuunsanayay, waxa looga fadhiyaa inuu Ilaah uga mahad celiyo siddeed iyo afartankii sanadood ee uu caafimaadka qabay intii uu labadaas sano ee xanuunka ah uu ka murugoon lahaa.

Marka saddexaad: Rumaystayaasha cidhiidhi ku jiraa, waa inay xasuustaan in nolosha dunidani ay tahay mid gaaban, halka nolosha danbe ay ka tahay mid dheer aabidiyan ah oo weligeed ah. Cidhiidhiga ay ku jiraanina waxa weeye mid hore u dhammaan doona. Kitaabka Quduuska ahi wuxuu ina leeyahay: “*Waayo, dhibtayada fudud ee wakhtiga yar ah ayaa aad iyo aad noogu. Sii yeesha culayska ammaanta ee weligiis ah. Ma fiirsanno waxyaalaha la*

*arko, laakiin waxyaalaha aan la arkin, waayo, waxyaalaha la arko in dhawr ah ayay sii joogaan, laakiin waxyaalaha aan la arkini weligood bay sii joogaan.*” (2 Korintos 4:17, 18).

Marka afaraad: Rumaystayaasha maraya ama ku jira wakhti adag oo cidhiidhi ah, waa inay xasuusnaadaan iyadoo dadka Ilaah ee quddusiinta ahi ay mareen jarribaado kuwooda in badan ka badani. Yacquub waxa waajib ku ahayd inuu raalli ku ahaado inuu abtigiis u shaqeeyo sannado badan isagoo weliba ahaa kii lahaa dhaxaltooyada Ibraahim iyo Isxaaq. Nebi Muuse isna sidoo kale isagoo ku dhex noolaa qasriga boqortooyada ee Masar, ayaa waxa dhacay inuu afatran sanno ahaa adhi jir, isagoo markii danbana saboolnimo kulasoo laabtay Masar. Sidoo kale Eliya waxay ahayd inuu dhuunto oo tukayaashu quudiyaan, halka Yeremyaahna lagaga tuuray ceel guntiis. Matin Luther oo isna ahaa islaaxi, markii uu dhintay xaaskiisa iyo carruurtiisa waxba uugamuu tegin. Haddaba caqli gal miyay tahay in rumaystayaasha maanta looga dhaafto dhibaata si aan looga dhaafin dadka Ilaah ee waawaynaa? Waxa intaasoo dhan ka sarreeya oo ah tusaalaha ugu wayn Sayid Ciise Masiix oon haysanin waxyaalaha ay haystaan dawocooyinka iyo shimbiruhu, waayo Isagu muu lahayn meeluu madaxiisa dhigo!

Marka shanaad: Rumaystayaasha ku jira wakhtiyada cidhiidhugu, waa inay Ilaah ugu mahad naqaan waxyaalaha uu iyaga siiyay. Waxa uu iyaga siiyay dabiicad ruuxi ah oo cusub, oo dabiicaddaasna waxay Ilaah ugu ammaani karaan si farxad gelinaysa Isaga, sidoo kalena waxa ay garan doonaan inay jirto farxad dhab ah oo ku jirta inay Ilaah ammaanaan wakhtiyaduu u diidayo waxyaalaha ay haystaan kuwo kaloon iyaga ahayni.

Haddaba farxaddu waa middan, haddaba miyaynu helnay? Farxadda jidka loo maro waxa ina tusinaya Erayga Ilaah, haddaba miyaynu bilownay inaynu qaadno oo marno jidkaas? Farxadda oo laga hadlaa waxay ka sahlantahay xaqiijinteeda, sidaas darteedna kuwa rumaysadkoodu cusubayahay waa inuu nafhooda ku beermo deganaanshiiyaha iyo qancitaanku isla marka uu bilaabo iimaanka Masiixiyaddu. Kuwa rumaysadkoodu horreeyayna waa inay ogaadaan inay baran doonaan waxyaalo badan, maxaa yeelay muminka ama rumaystaha dhabta ahi ma dareemo karo fillaanshiyo ilaa uu ka helo farxadda dhabta ah ee Ilaah uu bixiyo.

Su'aalaha Cutubyada Sagaalaad iyo Tobnaad:-

Cutubka sagaalaad wuxuu ina xasuusinayaa iyadoo qanacsanaantu ay ka timaaddo nimcada Ilaah ee ku sugan qalbiga dhexdiisa, haddaba iyadoo qanacsanaantu inaga maqnaataa ma waxay ka dhigantahay inaanay qaladkeenna ahay laakiinse ay tahay qaladka Ilaah? Suurto gal miyay tahay inaan cabashada iyo walwalka sii wadno innaga oo sugaynaa inta Ilaah inaga bedelayo?

Waxa aan soo baranay in waxyaalaha innaga dhiga kuwa qanacsan ay ka mid tahay inaynaan isku mashquulinin arrimaha adduunyada (eeg Matayos 6:19-34, Kolosay 3:1-4) iyadoo sidoo kalena ay tahay in muminiintu ay ku dul noolaadaan dunida iyadoo weliba masuuliyado innaga saaranyihiin qoysaskeenna, haddaba adigoo waxyaalahaas oo dhan ka fikiraya waxaad sharraxaad ka bixisaa waxa loogala jeedo “inaan la isku mashquulinin arrimaha adduunyada”.

Waxaad akhridaa Falimaha Rasuullada 16:16-25, kaddibna waxaad isku daydaa inaad ka fikirto adigoo taagan booska Bawlos, dabadeedna bal malee waxa dareenkaagu noqon lahaa haddii lagu garaaco oo lagu xidho iyadoo sababta waxaas laguugu samaynaana ay tahay wanaag aad samaysay daraaddiis. Waa maxay muhiimadda ku jirta tukashada iyo Ilaah oo la wayneeyo wakhtiyada lagu jiro cidhiidhiga?

Wakhtiyada aad kasoo gudubtay cidhiidhiga, maxaa kaa caawiyay inaad dareento raalli ahaanshiyo iyo kaaftoomitaan?

Marka rumaystayaasha uu lasoo gudboonaado cidhiidhigu ee ay ku jiraan jarribaadda, sidee ayaad uuga caawin kartaa inay ilaashadaan raalli ahaanshiyaha ay Ilaah kula macaamaloonaayan?

Maxaad ka baratay kitaabkan? Sidoo kale waa maxay is beddelka uu ku kordhin doono nolohaada?

By Abdi Osman copyrogiht.